





BUUGA FURAHA GUUSHA

QORAAGA BUUGA FURAHA GUUSHA

AYDARUS AHMED (QALINLE)

HORDHACA BUUGA

1:Hambalyo.....

2:waamaxay guushu.....

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

3:astaamaha guul ku gaadhi karto.....

4:sidee ku gaadhi kartaa guul.....

5:sidee uhaqiijin kartaa hadafkaaga.....

6:si aad uhaqiijiso hadafkaaga raac
talabooyinkan .....

7: tallaabooyin lagama marmaan u ah guulaha ganacsiga.....

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

8:astaamaha ay leeyihiin dadka guulaysta.....

9:caado oo hal ubuureyaasha ganacsi ee guulaysta ay ka wada simanyihiin.....

10:sidee ku noqon kartaa qof guulaysta .....

11: waa maxay guuldaradu.....

12: waxyaabaha kaa hortaagan inaad guul gaadho.....

13:sheekooyinka dadkii guulaha gaadhay .....

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

14: sheekadii guusha jack ma alibaba.com....

15:sheekadii guusha ee ibraahim alfiqi.....
16: wiilkii yaraa ee guulaystay.....
17: calaamado aad ku ogaan karto inaad wadada guushu ku taagan tahay

1: HAMBALYO

hambalyo hambalyo hambalyo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxaad qaaday talaabo aad ku hormarinayso aqoontaada si aad unaqotid qof guulaysta if iyo akhiro dhamaanteena ilaahay ha inaga dhigo kuwa guulaysta BUUG ONLINE waa goob aad ka heli karto bugaag kale oo ku xiiso galin doona

ALLAA WEYN NANKII AMINAA AWOODLE

2: WAA MAXAY GUUSHU

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

guushu waa himilo iyo hiigsi aad leedahay oo aad gaadho, mana aha mid ku
timaadda xaglo laaban, sahal, fikir gaabni, hammi yari iyo samir yaraan
toona.

Haddaba
guushu waa shay cayiman oo la isla yaqaan, laakiin waxa lagu kala
tagsan yahay heerka guusha. Qof waxa guul u ah ayaa qof kale u ah bar

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

bilawga guusha. Bal dhugo isbarbardhiga labadan arday. Mid ahaan,
hammigiisa u sarreeya ee waxbarasho waa inuu shahaadada derajada koowaad jaamacadda ka qalinqorto, haddii uu gaadhana ay uga dhigan tahay inuu
guul gaadhay; halka ardayga kale hankiisu gaadhsiisan yahay qaadashada
derejada jaamacadeed ee ugu sarraysa kana aflaxo. Markaas qaadashada

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

shahaadada koowaad waa irridda uu ka gelayo hammigiisa sare.

Guusha
 waxa sargooya hanka, hiigsiga iyo hummaagyada mustaqbaleed ee qofku meel dhigtay. Markaas waxay ka dhigantahay, nin waxa guul u ah ayaa kale u ah bilawga hayaanka guuleed ee uu hiigsanayo.

Sida

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

caadada ah dadka aad fikir wadaagga tihiin, waxay inta badan kaaga warramaan guul. Haddaba waddada guusha ee qof gaadhsiisa inuu naalloodo isaga oo guulaystay ayaa qof kale inay u mari weydo suurtogal tahay.
Waayo waxa jira kala duwaansho badan oo dadka dhexdooda ah.

Hammiyada uu qof ku fikiro na waxa ugu muc weyn, inuu guulaysto if iyo aakhiro

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ba. Weligaa miyaad aragtay cid leh waxaan rabaa inaan guuldarraysto?
Mase la kulantay cid raadinaysa waddada guuldarrada si ay u guuldarraystaan? Jawaabaha su'aalahaasi waa maya. Taas iskaba dhaafe,
dadka qaar waxa dhacda inay baadi goobaan waddada ay mareen kuwa guuldarraystay, si ay iskaga ogaadaan oo uga baydhaan jidkay qaadeen.
Waxaynnu odhan karnaa taasi waxay ka dhalatay baqasho ay ka baqayaan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

guuldarrada.

Dadka
 badankoodu guuldarro way la kulmaan, iyagoo u kala baxa laba; qaar
marka ay guulaysan waayaan is dhiiba, nolosha ka dhaca, han iyo hiigsi
danbe na yeelan iyo qaar marka ay guuldarraystaan wax ka barta oo ogaada
 khaladaadka ay sameeyeen si ay u saxaan. Waxayna dardargeliyaan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dedaalkooda ku jihaysan inay mar uun guulaystaan. Dedaalkaasna waxay isku dayaan iyagoo ku yididiiloonaya inay guuli u dhow dahay.

Waxa mudan in la tilmaamo sidee loo gaadhi karaa guul? Guusha waxa lagu gaadhi karaa iyadoo la maro wadiiqooyinkan:

- Dejinta hammi iyo hiigsi.

- In qofku baadho waxyaabaha uu u baahan yahay inuu sameeyo si uu u guulaysto

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

iyo waxyaabaha ka hor istaagi kara guusha.

· Waa inuu joogteeyaa oo ku dedaalaa hayaanka uu ugu jiro guusha.

· Waa inaad hubisaa kolba inaad hayso hilinka iyo toobiyaha aad u marayso guusha.

· Waa inaad u samirtaa hadimooyinka ku geddaaman jidka guusha oo haddii aad dhib mudato aad u dulqaadato.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

· Waa inaad niyad-samaan iyo talo saarasho Alle aad la timaaddaa.

·

Guusha markaad gaadhana, aad Ilaahay u mahadnaqdaa oo ka
dheeraataa kibir, una tafoxaydataa sidii aad guulo kale u dhalin lahayd.

Waxa
la isku raacay in guusha dhabta ah ee waaraysaa ay tahay guulaysashada

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aakhiro iyo raalli ahaanshaha Rabbi. Sida Ilaahay SWT uu Qur’aanka ku
sheegay, qofka guusha dhabta ah gaadhay inuu yahay “qofka la dhaafiyo
naar ama aan gelin naar, Jannaduna hoy u noqoto, kaas ayaa guulaystay”.
Maalinta aakhiro hal miisaan ayaa yaalla oo qof kasta camalladiisii
adduunyada lagu miisaamayo. Waxa kaloo Ilaahay SWT tilmaamay nolasha
adduunyo inay tahay “mid la qalday”

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Muhiimaddu

waxa weeyaan, inaad ogaato micnaha iyo ujeeddada aad u nooshahay ee aad adduunyada u joogto. Haddaad u fiirsato dadka nolosha aan fahansanayn waxaad arkaysaa iyaga oo nolosha ka quustay, wax guul ahna ka gaadhin.

Tusaale gaaban, dadka gaalada ahi waxay ku doodaan inuu qofku markuu doono nolosha iskaga bixi karo; macnaha is dili karo. Sababta taa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

keentay waxa weeyaan ka madhnaan iyo fahan waa’ ka haysta ujeeddadii loo abuuray iyo micnaha noloshan adduunyada.

Astaamo ayay leeyihiin dadka guulaysta ama kuwa leh awoodo ay ku guulaysan karaan, waxaana ka mid ah:

1. Isbeddel Jacayl:Dhammaan dadka raba inay nolosha ka sameeyaan guul,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxay naftooda ku qanciyaan inuu isbeddel waajib yahay. Waxay hoos iyo
korba dadka uu codkoodu gaadho ugu sheegaan, in isbeddel loo baahan
yahay. Waxa mararka qaar dhacda in laguu arko qof qaldan balse waa wax
nolosha ku caadiya. Nabi Muxammed csw, ayaa tusaale fiican kuu ah, iyo
dhammaan dadka nolosha horumarka ka sameeyay midkastood noloshiisa baadho.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

2.

Hummaag iyo qanaaco isbeddelku nooca uu noqonayo: Dhammaan dadka nolosha ka sameeyey horumarka waxay ku qanacsanaayeen, inay gaadhayaan meel ka fiican halkan ay joogaan. Dhammaan waxay madaxa ku haystaan, sawir ka turjumaya nolosha ay geeddiga ugu jiraan. Waxay markaad la sheekaysato ama akhrido buugta taariikh nololeedkooda ka arkaysaa, riyo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

wakhti ay soo jeedeen, taas oo adiga kuula muuqata hawo, balse isaga ula
muuqata xaqiiq, waana ta dhaxalsiisa ku adkaanta nolosha ay rabaan.

3.

Dedaal iyo karti dheeraad ah: Dhammaan dadka wax soo kordhiyay ee
kugu xeeran, hadday noqoto sheekh iyo shariifba, mid kasta wuxuu goostay
wixii uu beertay, midkasta wuxuu ku naalloonayaa habeenkiisa iyo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

maalintiisa intuu gashaday, taasaana rag iyo haweenba kala geeyey cirka
iyo dhulka.

4.

Go’aan iyo Xoog saarid: Ma jiro qof meel gaadha oon dadka fikirkiisa
ku qancin. Xusuuso dhacdadii cajiibka ahayd ee Suubbanihii CSW lagu
yidhi, inaader hubka dhig aan ku siinno waxaad rabto sida Suldaannimo,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Xoolo, Haween qurxoon, ee intuu aamusay uu ku yidhi “Wallee haddii
Dayaxa iyo Cadceedda midba gacan la ii saarayo inaanan ka tagayn waxa
aan ku taaganahay”. Dhammaan dadkii noloshan macnaha ku sameeyey waxay
ahaayeen kuwo ku adag waxay rabaan kuna qanacsan fikirkooda nololeed.

5.

Samir iyo Dulqaad:U fiirso dadka wax ah ama aad farta ku fiiqdo ee

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

noloshaada ku xeeran. Meel fog ha aadin. Eeg dadka xidhiidhka tooska ah
la leh nolosheenna. Ma jiro qof habeen ku gaadhay nolosha uu gaadhay.
Mana jiro qof saacadaha tiriyey, si uu u beddelo nolosha uu rabo balse
qof kasta wuxuu huray wakhti dheer isagoo muujiyey samir iyo dulqaad xad
 dhaaf ah, waana sababta uu Suubbanuhu CSW ugu lahaa Asxaabigii ku yidhi

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

“Alle noo bari in dadkan na ciqaabaya uu naga kaafiyo”
“Samra Ilma
Yaasirow ballantiinu wa jannee”.
Taasi wa macnaha samirka iyo dulqadka.

6.

Xirfadda maamulka wakhtiga:dadkani waxay si wanaagsan u maareeyaan wakhtigooda, iyaga oo uga faa’iidaysanaya qabashada waxyaabaha gaadhsiinaya guusha, waxayna ka fogaadaan luminta wakhtiga.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

7.

Iskaashi:Dadka guulaystaa waxa ay si fiican u kaashadaan oo ula
tashadaan dadka ku xeeran sida xaasaskooda, saaxiibbadood iyo dadka ay
hiigsanayaan.

3: ASTAAMAHA GUUL LAGU GAADHO

Dadka guulaysata waxa ay leeyihiin astaamo ama dhaqamo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aad u fara badan dhaqamadaas ayaa u hor seedo in ay naftooda horumar gaadhsiiyaan kadibna caalamka wax ku soo kor dhiyaan, hadaba waxaan soo qaadan astaamahaas kuwoo ga ugu waawayn. astaamahan adigu naftaada ku dabiq si aad hormar la taaban karo u gaarto astaamahana waxaana ka mid ah:

1. KALSOONI

Kalsooni: waxa weeyaan in aad u aragto naftaada mid wax soo saari karto ama wax soo kordhin karta guulna gaadhi karta. naftaada markaad ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kalsoonaato ayaa hiigsan kartaa waxaad rabto. waana furaha ugu muhiimsan ee guusha lagu gaadho.
‘Hal fure oo muhiim u ah guusha waa kalsoonida, hal fure oo muhiim u ah kalsooniduna waa diyaargarowga.’

Kalsoonidu waxaay ku siinaysaa awood aad hawl ku qabato taasina waxeey ku hor seedi kartaa in aad si dhib yar aad u guulaysato. Kalsoonidaas oo kuu horseeda horumar wayn taas oo kaa dhigaysa ruux ku haboon xaqiijinta hadafkiisa,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

naftaada oo aad ku kalsoonaataa waxaay ay kaa dhigaysaa mid wax walba qaban kara.
‘Hadii aad naftaada kalsooni siisid waxaad jiidi kartaa ku dhawaad wax walba.’

Naftaada ku kalsoonow waxaa aad ta qaannaa wax ka badan waxaa aad u malaynaysid in aad taqaaanid dadkana ku kalsoonow, in aad dadka ku kalsoonaato waa shay loo baahan yahay maxaayeelay hadaadan dadka ku kalsoonaani

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

naaftaadana kuma kalsoonaan doontid iskana ilaali gabi ahaan ba erayga kalsoonidarro. Sheeko xikmad leh: kalsoonida Aabbo ayaa gabadhiisa oo yar ayuu dalxiis geeyay si ay u soo daawato beeraha, xayawaanada iyo wabiyada, iyagoo dul socdo buundada(biriijka) ku dul yaala wabiga dushiisa ayuu gabadhii abbaheed ku yiri aabbo gacanta I qabso sidaadan ugu dhicin wabiga. gabadhii yareed oo ahayd gabadh illaahay xikmad wayn siiyay ayaa waxay ugu jawaabtay aabbo adigu iqabo maxaa yeelay laga yaabaa in

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aan kaa siibto hadaan anigu ku qabsado laakiin kaama siibanayo hadaad adigu I qabato gacanta. “ kalsoonida aad u hibayso dadka kaa mudani waxay kaa bad baadisaa hadimooyinka.”

Ahaw naftaada

Inaad naftaada ku kalsoonato oo aadan cidna la barbar dhigin waa jidka guusha. Ha ka dayrin waligaa

2. AQOON

Noloshaad la daris tahay Ha u doodin abidkaa Mid kaloo ku dayasho ah

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Abwaan maxamuud tukaale cismaan
Aqoontu waa furaha guusha waana midka mid ah astaamaha lagu gaadho guusha aqoontu waa iftiinka nolosha waana miisaanka uu qofku ku kala soocayo guush iyo guuldarada, samaanta iyo xumaanta.

‘Aqoon la’aan waa iftiin la’aan.’
Aqoontu waa anshax waa edabta waa anfac waana shayga ugu qaalisan oo uu qofi hanti ahaan u leeyahay waana shayga kuu sahlayo in aad gaadhid himiladaada tusaale

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

hadaad tiraahdo waxaan doonayaa inaan noqdo wariye oo aadan baranin cilmiga saxaafada waad ku guul daraysanaysaa inaad noqoto wariye fiican si aad guul uga gaadho mihnadaada waa in aad marka hore barataa cilmiga saxaafada. raadinta aqoontuna waa sir ka mid ah siraha guusha lagu gaaro.

3. DHAQAN WANAAG

Hadaad rabto inaad guulaysato waa in aad dadka si fiican ula dhaqanto kana fogaatid in aad dadka kula dhaqanto dhaqamo xun xun. Dhaqanka wanaagsan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxaa uu kaa dhiga yaa mid bulshada uu ku dhax nool yahay ixtiraaman. nooloshiisana ku guulaysta.

‘Anshaxu waa birishka u dhexeeya yoolka iyo guusha.’

4. ISKAASHI

Wada shaqayntu waxa ay yaraysaa hawsha waxa ayna badisaa guusha!

Bulsho wax aay horumar ku gaadhaa iyadoo dad keedu is kaashado oo isku kalsoonaadan. iskaashigaasina wuxuu u hor seedaa midnimo iyo wada jir meesha midnimo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

taalo guuli waataala maxaayeelay iskaashato ma kufto. Taasna waxaa inoo iftiiminaya gabaygan:

Taageeraday labo gacmood tamar ku yeeshaane Tiska waxaa la qaadaa markay tiirisaa bidixe Hadday midigtu keli taagan tahay tahar ma goyseene Mar kale waa iyadii iskaashiga laga lahaa:
Xaajadu ma gobol oo ma gobol, haysku ganac goyne Gobolkeed gugii hore wixii go`ay ha loo daayo Gawdhagawdh yar baa nagu haree aan idiin gaadhsiino

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Dabadeedna geeshadda sidii gacal haloo aa`o
Nin gooni uma ciidamee gacal ha lays moodo
Markaad rabto inaad hawl guul ka gaadho waxaa fiican in aad dadka la kaashato oo aadan kaligaa isku gaar yeelin maxaa yeelay far kaliya fool ma dhaqdo hadaad dadka la kaashato hawshaada waxaad ka faa`iidi. in aad hawsha si dhib yar u qabatid iyo in wakhtiga oo ah halbeega nolosha qofku uu kuu noqdo mid aadan ka qooma mayn.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

‘Ma qabsan karno wax yaalaha aynnu rabno anag oo wadajirna mooye.’

5. DAACADNIMO

Daacadnimadu waa tilman ka mid ah tilmaamaha ay leeyihiin dadka guulaysto waxay daacad u yihiin naftooda, dadkooda iyo dalkooda ma khiyaamaan dad kooda maxaayeelay waxeey ogsoonyihiin in khayaanadu ay ku soo dul noqoto khaa`inka laftiisa. Khaa’inkuna uun san liibaanin.

Sheeko xikmad leh: khiyaanada

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Nin baa yiri war ninyahoow qiyaanada i bar markaas ayuu ninkii caqliga badnaa ku yidhi waa yahay horta hashaada isoo lis, markii uu usoo lisay ayuu ku yidhi hadaba waanigaa kuu soo lisee khiyaanada ibar markaasu ninkii caqliga badnaa yidhi dee wa anigii ku baray.

Waa maxay dulucda sheekadu ?

6. U ROONAANTA DADKA

Sheeko xikmad leh: wax u tarka dadka

Gandhi ayaa hada ka hor raacay tareen. markuu lugta hore la helay ayuu tareenkii dhaqaaqay, kadib mid ka mid kabihiisi ayaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhulka ku dhacday mana fududeyn inuu kabta soo qabsado illeen tareenku joogsi ma lahane Gandhi wuxuu durbadiiba ku dhaqaaqay inuu kabtii kalena ku tuuro halkii ay tii hore ku dhacday, dadkii tareenka saarnaa oo aad ula yaabay falkaas, una haystaan Gandhi inuu caqlidarro sidaas u sameeyay ayay waydiiyeen waxa kabtiisii oo ka dhacday ku kalifay inuu tii kalena ka daba tuuro sidaasna ku kabo beelo. Si sahlan buu ugu jawaabay kabtii hore sooma ceshan karo oo ma awoodo waxaan se awoodaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

nin hindi ah ee kabtaas heli doona aana ku caawiyo inuu tan labaadna la helo oo sidaas uu laba kabood oo ku socosho iyo labisgal ah u helo!

7. ISXILQAAN

Isxilqaanku waa inaad wax kasta oo kugu waajibay inaad ka soo baxdo duruuf kasta oo jirta aanay kaa hor joogsan, caqabad kasta ama dhib kasta oo kaa hor timaada aanad u joojinayn, dibna aanad u noqonayn ilaa guushaada aad ka soo taabato.

8. RAJO SAN

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Rajada sani waxaa weeyaan waxaa ku tusayo mustaqbalka waxaad noqon lahayd qofkasta oo guul inuu gaadho rabo waxaa laga rabaa waxaa uu doonayo inuu guul ka gaadho inuu dhinaca fiican ka eego rajaystana wax fiican oo uusan ka eegin dhanka taban ama xun maxaa yeelay hadii waxaa aad rabto inaad ku guulaysato aad ka eegto dhanka xun waxaay noqonaysaa baasaysi. baasaysiguna waxa uu ka midka yahay asbaababaha ugu waawayn ee kuu diidan inaad noloshaada ka gaadho guul aad ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

faraxdo.Waanad kartaa rajadaada inaad rumayso kaliya waxaad la kaalaydaa dadaal iyo dulqaad iskana ilaali baasaysiga .
‘rajadu waa awoodda lagu arko inuu jiro iftiin aanu sameyn dhamman gudcurku

4: SIDEE KU GAADHI KARTAA GUUL

Qof kasta waxaa ku beeran hammi ah in uu mar uun guul gaadho, ruuxa bulshadu ku qiimayso sarraynta iyo karaamaduna waa kan laga arko

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

guul uu ka gaadhay hawl uu u gacan qaaday ama si guud nolosha. Cilmibaadhis lagu sameeyey furayaasha guusha loo kaashan karo ayaan akhristayaasha u soo turjunay qodobbada ugu muhiimsan guushaas.

1. himilo cad: Sirta koowaad ee guusha noloshu waa in uu qofku dhigto ujeedooyin cadcad iyo hawlo qodobbaydsan oo uu doonayo in uu gaadho. Waxaa iyaduna muhiim ah in qofku ujeedooyinkiisa uu qoranayo u qaybiyo kuwo himilada dhow ah iyo himilo fog oo uu hiigsanayo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

mar dambe in uu gaadho. Waa in uu qoro jidka uu u marayo himilada dhow oo u kala horreysa sida ay ugu kala muhiimsan yihiin, kadibna uu qoro jidka uu uga wareegayo haddii jidkaas hore xidhmo, waxaa iyaduna marar badan muhiim ah in hawsha uu doonayo in uu ku guulaystaa ay lahaato waqti xaddidan oo uu qorshaysto in uu ku gaadho, si haddii waqtigaas uu ku gaadhi waayo u dib uga fikiro waxa qaldan iyo sida uu ku sixi karo. 2. Go'aan qaadasho: Waa in go'aamada aad qaadanaysaa ay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

noqdaan kuwo fulintoodu kaa go’antay, haddii bilowga hore aad shaki badan ka qabto fulitaanka go’aankan, ha qaadan go’aankaas ee dib uga fikir.
3. Awoodda saddexan: Jaran-jarrada guushu waxa ay ka bilaabataa kaabadda koowaad oo go’aan qaadasho, laakiin ha illaabin in go’aan aad ku gaadho hawlqabashadeeda uu ka horreeyo saddex arrimood oo ah, in aad marka koowaad garato awooddaada, dhaqaale, jidheed, aqooneed iyo karti kasta oo hawshani u baahan tahay in aad leedahay. Haddii

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aad taa hubto waxaa iyaduna muhiim ah in aad garato waxa aad ku wanaagsan tahay, tusaale ahaan haddii aad ogtahay in aad saxafi ku habboon tahay oo hiwaayaddii hawshan iyo aqoonteedii aad buuxin karto ha isku hawlin in aad noqoto taliye milateri si aanay ugu fashilmin gaadhisteeda ama ugu yaraan waqti badani kaaga lumin, arrinta saddexaad waa in aad yeelato hal-adaygii go'aanka aad qaadanayso iyo samirkii aad ku sugi lahayd natiijadiisa, haddii aad saddexdaas hayso

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxa aad qaadan kartaa go’aan adag oo guushaada fure u noqda.
Awoodda saddexan ee qofka looga baahan yahay in uu ku dhaqmaa waa;
– Oofin: Oo looga jeedo in qofku marka koowaad garto yoolkiisa iyo halka uu beegsanayo iyo weliba jidka uu u marayo.
– Hal-adayg: Oo ah in qofku uu ka soo gudbo marxaladdi fikirka oo uu si ficil ah u gudo galo hawsha uu doonayo ka midho dhalinteeda.
– Dul-qaad: Waa habka keliya ee uu qofku kaga gudbi karo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

caqabadaha ka hor yimaadda, kuna sii adkaysan karo dhibta ka sokaysa gaadhista hadafkiisa.
4. Curin: Arrimaha waayo-aragnimada lagu ogaaday waxaa ka mid ah in curintu ay ka mid tahay furayaasha ugu muhiimsan ee guusha noloshaada aad ka gaadhayso. Curintu waa qofka oo mar kasta maskaxdiisa miira si ay u keento afkaar iyo qorshayaal cusub. Waa qofka oo hal-abuur yeesha mar kasta oo uu hawl ka faraxashana ka fikira hawsha kale ee iyadana ay tahay in uu guul ka gaadho.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

5. Qaladaadka oo wax laga barto: Qaladaadku ma’aha dhammaadka nolosha, mana ah dhammaadka rajada guusha, balse keliya khaladku waa dugsi ay qasab tahay in qof kastaa maro oo loo baahan yahay in wax laga barto lagana faa’idaysto. Qaladaadka aad gelayso inta aad ku gudo jirto dadaalka aad himiladaada ku gaadhayso waa in aad u qaadataa waayo-aragnimo iyo dersi aad ku cibro qaadanayso. Iska jir in qalad aad mar gashay uu kugu noqdo boog abid ku daba socota, si joogto ahna aad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

u xasuusato, waayo taasi waxa ay kaa hor istaagaysaa in aad dadaal dambe gasho oo cabsi ayaad ka qabtaa in aad haddana qaldanto. Qaladka ka qaado wixii duruus ku jira, sida in aad fahamto sida uu ku yimi iyo sida ay tahay in aad mar labaad isaga ilaaliso, intaa waxa ka soo hadha waa qaladka in aad dhabarkaaga dambe ka tuurto si aanad dib ugu xasuusanba.

6. Ka faa’idaysiga waqtiga iyo nidaamintiisa: Arrimaha muhiimka u ah guusha nolosha waxaa ka mid ah in qofku uu yaqaanno sida ugu fiican ee uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waqtigiisa ugaga faa’idayn karo gaadhista yoolkiisa nolosha. Waa in aad waqtiga u aqoonsato in uu yahay hanti qaaliya oo Alle hibo kuu siiyey, sida saxda ahi waa in aad ka dhigato raasamaal aad ka faa’idaysato, sababna u noqda guul aad gaadho, haddii kale waa seef laba-af-leh oo adiga ayaa uu ku jari.

7. Rajo-san: Rajo samaantu waxa ay ka mid tahay tilmaamaha muhiimka ah ee lagu garto ruuxa guusha gaadha. In qofku khayr rajaystaa waxa ay qalbigiisa ku beertaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

rajo fiican iyo kalsooni uu naftiisa u qaado, waxa aanay ku dhiirri gelisaa firfircoonida iyo shaqada, arrimahaasina dhammaantood lagama maarmaan ayaa ay u yihiin guusha uu ruuxu doonayo in uu noloshiisa ka gaadho.
Guushu waa maxay?
Guushu waa himilo iyo hiigsi aad leedahay oo aad gaadho, mana ahaa mid ku timaada xaglo laaban, sahal, fikir gaabni, hami yari iyo samir yaraan toona. Guusha waxa sargooya hanka, hiigsiga iyo humaagyada mustaqbaleed ee qofku meel

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhigtay, markaas waxay ka dhigantahay, nin waxa guul u ah ayaa mid kale u ah bilawga hayaanka guuleed ee uu hiigsanayo.
Guushu waa wax cayiman waa wax qofkasta yaqaan, waa wax cidi ku sifoowda ay dadka kaga tilmaamantay astaamo gaara, loona xiisoodo raacida dariiqa ay mareen, iyadoo arintani jirto hadana ma jirto wado qudha oo guusha kugu hagta waxa laga yaaba halka uu mid inaga midi u maro in ka kuxiga ka waayo, ama qofkasta iyo xaalkasta leeday dariiq u gaara.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Guushu maaha xoolo badan, maaha shaqo badan, mana aha mansab sare, balse guushu wa xasilooni Nafeed iyo daganaansho niyadeed, guushu waa wax qofka u sahasha inuu si niyad samana ugu dhex nooladoo bulshadiisa, waxa suura gal inad wakhti badan ku bixiso waxad u aragto guul wayn, balse qofkale uu ku arko qof tabcanaya Daal iyo dhib, tusale ahaan qof sabol ah, guusha u arka inu marun helo wax uu iskaga dabool bahiyaha nolosha ee kala dhadhanka duwan..

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Hadii arintu sidan tahay waxa laysku raacsan yahay in ay noloshu kala duwananshaha ku wacantay kuna micno fiican tahay, balse ay jiran wax yaabo lawadaago si nolosha iyo nafta loogu raro meel ay u aragto munaasib wakhti iyo xaalad go’an, loogana rero meel ay kuqanacday inay wajib tahay in laga baxo ama laga hayaamo, anoo ka duulaya Mabaadidan guud ee asaasiga ah waxan isku dayeya in aan ino so gudbiyo Astamaha ay ka midaysanyihiin dadka Guusha sameeya noockastoy yihiin..

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Wax ka baro Astaamaha Guusha

.....

1.Dajinta hami iyo hiigsi Isbadal jogto ah : dhaman dadka raba inay nolosha ka sameeyan Guul waxay naftooda ku qanciyan inuu isbadal waajib yahay, waxay hoos iyo korba dadka u codkoodu gadho ugu sheegan in isbadal loo bahan yahay, wax mararka qar dhacda in lagu arko qof qaldan balse wa wax nolosha ku caadiya, Nabi Muxamed (CSW), ayaa tusale fican kugu ah, iyo dhaman dadka nolosha horumarka ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

sameyey midkastood noloshisa badho.
2. In aanad mar labad sameyn khalad aad horay u sameysay, taasi micneaheedu maaha in hadii aad shey mar ku guuldareysato in aad mar kale ku guuldareysanayso, lakin waxay tahay in aad wax ka barato khaladaaddkaagi hore ee aad Khalad kaga oo aad wax ka barata, oo aanad ku si socan waa wadad guusha .
3.Humaag iyo Qanaco Isbadalku Noocu noqonayo: dhaman dadka nolosha ka sameeyey horumarka waxay ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

qanacsanayen inay gadhayan meel ka fican halkan ay joogan, dhaman waxay madaxa ku haystan sawr ka turjumaya nolosha ay hayanka ku yihin, waxay markad la shekaysto ama akhrido buugta taarikh nololeedkoda ka arkaysa Riyo wakhti ay sooo jeedan, taso adiga kula muqata hir balse isaga ula muuqata xaqiiq, wana ta dhaxalsisa adayga iyo gadhida noloshoda ay raban.
4. Dadaal iyo Karti dheerad ah: dhaman dadka macnaha sameeyey ee kugu xeeran haday noqoto shek iyo sharifba

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

midkasta wuxu goostay wuxu beertay, midkasta wuxu ku naalonaya habenkisa iyo malintisa intu gashaday, taasana waata dadka kala sareysisay,ee gulayste iyo guldarayste ka dhigtay

5. Samir iyo Dulqaad: u fiirso dadka wax ah ama aad farta ku fiiqdo ee noloshada ku xeeran, iyo dhaman dadka samaynta toska kule noloshena ma jiro qof Haben ku gadhay nolosha u gaadhay, mana jiro qof Saacadaha tiriyey si u badano nolosha uu rabo balse qofkasta wuxu huray wakhti dheer isagoo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

muujiyey samir iyo dulqaad xad dhaafa, waata sababtu Subanuhu (CSW) ugu laha Asxabigi ku yidhi alle noo bari in dadkan na Ciqabaya u naga kafiyo: Samra Ilma Yasiro Balantinu wa janee, taasi wa mancaha samirka iyo dulqadka. 6. Go’an iyo Xoog Sarid: ma jiro qof meel gaadhay oon dadka fikirkisa ku qancin, soo xasusto dhacdadii cajibka ahayd ee Subanihii (SC W), lagu yidhi Inader hubka dhig an kusino waxad rabto, Suldanimo, Xoolo, Hawen Quruxon, ee intu amusay u ku yidhi Wale hadi Dayaxa iyo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Cadceeda midba gacan laysaarayo inan ka tagayn waxa an ku tagnahay. dhaman dadki noloshan macnaha ku sameyey waxay ahayen kuwo ku adag waxay raban kuna qanacsan fikirkooda nololed.

7. Guulaha iyo wax soo saarka cusub ee manta la gaadhay waa riyadii shalay. Haddii aad u fiirsato waxyaabaha kugu xeeran sida dhismayaasha dhaadheer, maraakiibta,diyaaradaha, telefonada ,internetka iyo idaacadahuba waxay shalay ahaayen riyo ku jirta maskaxda

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

mid kamid kii daahfuray. Riyadadu waa meesha ay ka bilaabanto guul kastaba waa cunsurka ugu muhiimsan ee wax qabadka. Waxaa xusid iyada oo rayadeenu aanay xudud ahayn.

Wuxu yidhi Alber Ayniston : “Riyadu way ka muhiimsan tahay Aqoonta”

8. Arimaha ugu waaweyn ee guusha lagu gaadho waxaa kamida samirka, oo ah inaad adkaysi yeelato dhibatada oo aanad dagdagin Ilaahayna Qur,aankiisa wuxu ku yidhi “samra oo dhabar adayga oo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ilahay ka baqaa waad guulaysan doontaane” markaa Illahay guusha wuxuu ku xidhay waa samir. Waxa kale oo Illahay aayado farabadan kaga hadlay samirka abaalkiisu in u yahay jano iyo khayr. Marka aan ka hadlayno horumarka maadiga ahna waa inaad u samirto shaqada aad hayso ee aad ku hiigsanayso guusha aad rabtid.

Xaglo Laban Guul laguma Gadho

Adu hays xaqiirin intaa aanay dadka kale ku xaqiirin, Isku kalsoonow oo niyadada waanaji Illahayna taalo saro mar kasta .

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

9. Ha u ogolaan dadka kale inay hoos ku dhigaan.Waxa hubal ah in aad soo martay noloshaada guuldarooyin faro badan . si kastaba ha ahaate ha u ogolaan dadka kale in ay ku niyad-jabiyaan ama ay kugu tilmaamaan in aad tahay qof aan waxba qabsan Karin. Ma jiro qof waada wanagsaan qof waliba khalad wuu sameeya,hadaba ku dhiiri geli naftaada in aad tahay qof wax qabsan kara guulaysana.
10. Ha ka baqaan guusha: hadi aad ka baqato wadada guul darada ayaad ku dhacaysa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waligana lagama yaabo in aad heeshid.
Guushu ku imaan mayso aada radsaanaya .
Waad guulaysan insha Allah
11. In qofku baadho waxyaabaha uu u baahan yahay inuu sameeyo si uu u guulaysto iyo waxyaabaha ka hor istaagi kara guusha.
12. Guushu ku so dhawayn mayso roogna ku dadin mayso aada samaynaaya .
13. Talabda u horeysa waay adagtahay lakin aada fududaynaya .

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

14. Noqo qof jira, noqo qof la soo higsaado noq qof samiir leh iyo dulqaad,
15. Adu hays xaqiirin intaa aanay dadka kale ku xaqiirin,
16. Isku kalsoonow oo niyadada waanaji Illahay taalo saro mar kasta .
ugu danbayntii dadkani waxay sifo u leeyin Ababulka iyo Adeegsida Awooda dadka kale, ama degaanka ku xeeeran, waxay inta badan isku dayan inay abuurtan jawi la saxiba kaso ku gacansiya marka ay hoos marto, sida Lataliyayaal dacada, iyo cidkasto ay u arkan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

inay gacan kasinayso gadhida halka ay raban, waxanay isku dayan inay yareeyan Cadawgooda wakhtiga bilawga ama awood daaraan Sidee guushu ku timadaa
Qof walibaa oo dunidan ku nool waxa uu jecel yahay in uu gaadho guul ama uu hadafkiisa ka dhiidhiyo, balse si aan hadafkeena u gaadhno waxa ay inooga baahan tahay in aan la imano wadadii aan u mari laheyn ka dhabeynta himiladaas. Badanka dadka way ku adagtahay in ay waddadaas u sabraan, waayo marka aad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

doonaysid in aad horumar gaadho dhinaca ay doontaba ha khusaysee kolay dhibaato iyo carqalad way kaa hor hadaba waxa jira dhawr arimood oo aan is idhi waa wadada horumarka lagu gaari karo, qofka sameeyaana uu ka midho dhalin karo horumarka uu hiigsanayo ayaan hoosta ku xusi doona:
1- Talo saarasho: Dad muslim ah ayaynu nahay,Qofku waa in uu laba ragcadood oo la idhaahdo salaatul istikhaarah Tukada, salaadaas waxa uu ilaahay Qofku kaga codsanaya in hadii hawshan uu doonayo khayr u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

leedahay ilaahay waafajiyo hadii aanay khayr u lahayna ilaahay ka joojiyo.

2- Dareen: Qofka oo leh karti uu ku arko meesha ay ku jirto fursad uu horumar ku gaadhayo, kadibna isku daya inuu raadiyo waxii u suurta galin lahaa si uu arintaa uga midho dhaliyo.

3- Dhiiranaan: In uu qofku ku dhiiranaado hawshaas uu qabanayo.

4- Horumar: Qofku in uu yahay mid jecel in uu mar walba horumar iyo wax cusub sameeyo.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

5- Xiiso: Qofku in aanu xiiso 4 daqiiqo ah lahayn, waa in uu qofku danaynayo waxan oo uu karti badna leeyahay, waa in uu noqdo qof fiiro dheer leh.
6- Kalsoonida: In uu qofku naftiisa si fiican u yaqaan, iskuna kalsoon yahay.
7- Edeb: In uu yahay qofku qof edab badan oo degan, dareen wanaagsana u leh la dhaqanka dadka, si uu cidkasta oo hawl kaga xidhanto si fudud uga dhamaysan karo.
8- Jidka: In qofku uu kala dooran karo jidka uu u marayo horumarka uu hiigsanayo, isaga

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

oo dooranaya wadada ugu fudud ee uu horumarka ku gaadhayo.
9- Soo jiidasho: In qofku uu soo jiidan karo indhaha dadka taas oo looga jeedo in uu noqdo qof firfircoon oo dadka la saaxibi kara(friendly Person)
10- Tartan: Qofka In uu tartami karo waayo Wadada horumarkiisa isag oo ku jira ayuu tartan kala kulmi kara dadkale marka waa in aad tartami kartid ood ka guulaysan kartid dadka kula tartamaya.
11- Meel wanaagsan: In uu qofku badanka joogo meel

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

wanaagsan oo ay joogaan dad horumar gaadhay, dad uu kala tashado wixii carqalad ka hor timaada, dad badanka ka sheekeeya horumarka iyo sida loo gaadho.

12- Dareen: In uu qofku leeyahay dareen xoogan iyo jacayl uu u qabo hawsha uu doonayo inuu horumarka ka gaadho.

13- Haka hadhin: Waxa aad inbadan soo waday hadii aad ku guulaysan waydo ood ku guul daraysato haka hadhin oo ha niyad jabin, ma ogtahay ninkii laydhka sameeyay in uu laydhku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

shaqayn waayay 999 oo markii 1000 uu shaqeeyay intaas oo dhan carqadal iyo dhibaato ayaa ka hor imanaysay
14-Cadaadinta nafta: Naftaada ku cadaadi sidey hore ugu socon laheyd mar kasta iyo si kastaba , haka shakiyin hana ka xishoon hadafkaaga ,naftaadana ha mahdinin , hubsana inaanad wali gaadhin meeshii u sareysay, mar kasta higso meesha aad joogto meel ka sareysa inaad gaadhid.
Hadaba imika waad ka jawaabi karta Su’aasha aan hadalkeena

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ku bilaabanay, Si wanaagsan ayaanad uga jawaabi karta Tilmaamahani waa kuwo guul lagu gaadhayo, waxaana haboon in qofkastaaba uu miisaamo meesha uu ka joogo tilmaamahaas, oo uu ogaado meelaha uu ku liito oo kadibna iska dhiso.
Guud ahaan marka la eego umadeena Somaliland Degdeg ,Fudayd iyo markaba afka buuxsoo oo lacag hel ayaa inagu wada abuuran, dabeetana dagdagaasi in aan guuldaraysano ayuu sababa.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Qofkastaaba in himilo sare uu hiigsado ayaa wanaagsan

5:SIDEE U HAQIIJIN KARTAA HADAFKAAGA AMA GANACSIGAAGA

Guul ganacsi inta badan waxaa lagu gaaraa go’aan adag, geesinimo iyo in aad wax ka barato dadka waayo aragnimada buuxda u leh arirmaha ganacsiga, islamarkaana hirgaliyay ganacsiyada horumarka gaaray ama guuleystay .

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Haddaba, Haddii aad doonayso in aad ganacsi horumar leh samayso waa in aad tixgalisaa talooyinka dadka waayo-aragnimada leh ee soo arkay loolanka ganacsiga iyo horumarkiisa.
Halkaan waxaan idinkugu soo gudbin doonana qaar ka mid ah talooyinka ugu muhiimsan ee laga dhaxlay qaar ka mid ah ganacsatada ugu taajirsan dunida,Waxaana ka mid ah : Naftaada loolan gali – Richard Branson oo ah ninka aasaasay shirkada Virgin ee caanka ah ayaa ku talinaya in qofka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

doonaya in uu ganacsi abuuro uu diyaar u noqdo in uu loolan joogto ah galiyo naftiisa. Waxa uu aaminsanyahay in noloshu ay tahay waxbarasho joogto ah oo aad maalinkasta wax-cusub barato.

Qabo shaqo aad jeceshahay – Steve Jobs oo ahaa ninkii horumarka weyn gaarsiiyay shirkadda Apple ayaa ku talin jiray in dadka dhalinyarada ah ay sameeyaan ganacsiyo aysan lacag darteed keliya u abuurin balse ay sameeyaan ganacsi la xiriira waxyaabaha ay jecelyihiin si ay ugu raaxaystaan.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

U barrer Qatarta – Jeff Bezos oo ah agaasimaha Amazon waxa uu leeyahay in aadan waligaa ogaanayn qiimaha fikradaada ilaa aad tijaabiso. Waxa uu sheegay in aad ka shalaaynayso in aadan tijaabin , halkii aad ka shalaayi lahayd fashilka. Waayo fashilkaas cashar ayaad ka qaadanaysaa balse fikrad aadan tijaabin waxba kama faa'idaysid. Aragti lahoow– Agaasimaha Tumblr oo lagu magacaabo David Karp ayaa aaminsan in ganacsadaha hal-abuurka leh uu yahay mid aragti-dheer leh oo ay u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

caddahay waxyaabaha uu doonayo in uu sameeyo iyo sida uu ku gaarayo hadafkiisa. Naftaada aamin – Henry Ford oo ahaa ninkii aasaasay shirkada baabuurta ee Ford ayaa laga soo wariyay in uu yiri ” Haddii aad aaminsantahay in aad wax samayn karto iyo haddii aad aamisantahay in aadan samayn Karin, Labadaba waa ku saxsantahay” Haddii aad aaminsantahay in aad guuleysanayo, waad helaysaa wadooyinkii aad ku guuleysan lahayd balse haddii aadan aaminsanayn waxaad helaysaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

marmarsiiyo aad ku guul-daraysato.
La soco dadka wanaagsan – Qofka aad la socoto, waxa uu saamayn ku yeelan doonaa qofka aad noqon doonto mustaqbalka. Reid Hoffman oo aas aasay bogga LinkedIn ayaa ku talinaya in wadada ugu degdegga badan ee aad isbedal ku samayn karto ay tahay in aad la xirato ama la saaxiibto dadka aad doonayso in aad ku dayato oo aad heerkooda gaadho.
Samir Yeelo– Qofna daqiiqad kuma guuleysto, qofkasta meel ayuu ka bilaabay. Steve Jobs

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ayaa yiri “Haddii aad si qoto dheer u fiiriso dadka guuleystay oo dhan waqti dheer ayay ku qaadatay” diyaar u noqo in aad waqti galiso ganacsigaaga.
Samayso Koox Hawlkar ah–
Cidna guul ganacsi ma gaadho kaligeed, kuwa guuleystay waxay sameysteen koox hawlkar ah oo ka dambaysa.
Sameyso koox awood leh haddii ay ahaan lahayd shaqaale ama cid kale oo ku taageerta.
Ha hilmaamin hadafkaaga –
Markasta madaxa ku hay yoolka aad doonayso in aad gaadho. Ryan Allis oo aasaasay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

shirkad lagu magacaabo iContact ayaa sheegay in subax-kasta uu ku celceliyo dhowr jeer yoolkiisa si uusan u hilmaamin. Cashar ka qaado qaladkaaga – Haddii aad ganacsi abuurto waa la hubaa in aad qalad samayn doonto, laakiin ganacsatada horumarka gaadhay waa kuwa cashar ka qaata qaladkooda oo aan markale ku celin isla qaladkii.

6: SI AAD UHAQIIJISO HADAFKAAGA RAAC TALAABOOYINKAN

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

1: Ugu horeen Marka hore aamin in uu" Ilahay subhaana Watacaala" yahay qani adana aad tahay Faqiir, Marka aad taa Rumaysatid oo aad yaqiinteeda Latimaadid Yeelo kuwan mid Kamind ah

2. Yeelo Awood Wax Kaydsi , means" Power of Savings" .

a) Ha eegin Cida ama waxa aad haysatid maanta Just la qabso Dabeecada ama Nolosha ilahy sida uu kuu siiayay, qodobkani

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waa qodobka aan is idhi hadii uu shakhsi kastaa yeesho uu ku noqonkaro mudo kooban Millionaire,

b) Ka feker hadii uu yahay Mushaharkaagu $100 oo aad boqolkiiba konton 50% kharashgaraysid, hadaba akhristow Muhiim maahan Lacagta ama Dakhliga ku soogalya Maanta inta uu leegyahay,

c) waa in aad barataa sida wax loo kaydsado in taanad noqon Taajir,waayo hadii aanad waxba save garaysan ama aadan kaydsan ma helaysid Dakhli

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dheeraad ah oo aad investment kale ku qabsatid, ha ahaado in aad guri dhisatid, guursatid,gaadhi iibsatid, ganacsi furatid,

d) Dhibka ugu badan ee ka imandoona qodankaygan Koowaad, waan ogahay waxa weeyaan in ay dad badani is yidhaahdaan maanagaa haysana waxa aanu kaydsano, balse muhim maahn Lcagta aad kaydsanaysid inta ay leegtaahy waxaa muhiim ah xataa hadii aad $1 aad bishii kaydsatid waxbaad kaydisay. Ujeedaduna maahan waxan aad kaydinaysid

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

balse waxa weeyaan in aad baratid sida wax lookaydsado "Habit of Saving". kaydso waxa yar hadii aadan waxa badan haysan, kaydso wax badan markaad Wax abdan heshid.

3. Ha raacid Hamadaada Nafeed , sidaynu ogsoonahay naftenu waxa ku xeeran ama lamaane la ah ibliis ama shaydaan labadooduna waa labada qofka ka tuura jar hadii dhaka xun ee markasta inoo hagaan u raacno, balse adi hadii aad tahay qof doonaya in uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

noqdo Millionaire waa in aad xadaysaa labadaas, waayo hadii aad taariikhda dib u racdo oo aad eegto dadka imika aduunka ugu taajirsan sida ay ku keeneen hantidan aadka u farabadan waxaad ogaanaysaa in ay ku qaadatay mudo kabadan 20 sano oo ay wax kaydsanaeen, sidoo kale hamada nafta iyo shaydaanka waxaa ka mid ah in ay ku tusaan markasta in taajirnimadu tahay in Baabuur qaali ah la kahaysto in guri Filo ah laga soo tooso, in hudheelada kuwa ugu qalisay ee sida Maansoor iyo Ambasedoor

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

wax la ga cuno, hadaba akhristow taasi taajirnimo mahan ayaa la odhankaraa ee waa Faakahaysi ama Hamadii shaydaanka iyo nafta oo aad raacado, waayo kaxaysashada gaadhi qaali ah iyo ka cuntaynta Hudheelda noocaas ahi maahan mid taajir nimo kuugu filan, waayo "Lacgataadi waxaad ku kharashgaraysay faakahaysi xalkii aad ka fekeri lahayd in aad iyada korisid" you have spent all your money into luxury items instead of growing them!, runtii qodobkan labaad waa mid qofkasta oo akhristaa uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dareemayo loogana baahanyahy in uu ogaado in uu naftiisa aanay ku horu marayn ama uu Taajir ku noqonayn Faakahaysigan noocan ah.

4. Maal gasho Maskaxdaada , oo baro sida lo controlo habka looga fekersiiyo maskaxdaada, iyo sida kor loogu qaado fekerka masakada si ay kuugu hagto guulo sare, maxaa yeelay maskaxdaado waa hantidaada ama Asset kaaga ugu qaalisan noloshaada, markaa maal gasho iyada si ay wax uun

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kuugu soo celiso. taas macnaheedu maahn in aad afka taagtid oo aad kibir la timaadib, balse waxa weeyaan in aad psychology kali ahaa aad naftaada ubartid in laga rabo in ay Horumarkaas la timaado, wayo naftu markasta wixii lagu celceliyo ayay ku dadasahaa, maanta hadii aad naftaadu ku clecelisid "waxaan rabaa in aan qof xun noqdo" runtii waxaa hubaal ah in aad noqonaysid qof xun, markasta uu shay maskaxdaada ku soo dhaco oo aad rumaysantahy in aad go-aan ka gaadho go-aan kaas aad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

gaadahysid waa mid ay maskaxdaadu hormood ka tahy kuuno horseedi doona in aad qiimaysid noloshaada maanta, hadii aad maanta Faqiir tahay becouse of your mindset, tani waa tusaalooyin bas aan uga la jeedo in wax kasta oo aad maskaxdaada ku haysatid ay kuu muujinayaan uun waxa aad nolosha dhabta ku haysatid.

5. Markasta samee wixii aad jeceshaahy ee wanaagasan, eeg dadka aduunka ugu taajirsan sida " Bill Gates, Warren Buffett,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Donald Trump, Robert Kiyosaki, Dahabshiil,Indhodeero, Omaar iyo in kaloo badan waxaad arkaysaa in mid kastaa talaabada uu qaadayo ay tahay mid uu jecelyahay, waana sababta ay maanta taajiriinta u yihiin, maxaa yeelay hadii aad samaysid waxa aad jeceshaahy ee wacan kama niyad jabaysid waand ku raaxaysanaysaa intaad wadid howshaas, waayo waa wax aad adigu nafsad ahaantaa go-aansatay ood jecleysatay, tusaale ahaan ma dareentaa Caajis ama Niyad jab marmarka aad wax akhrinaysid

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ama aad baadhaysid reportka companigaaga , sidaas daraadeed taasi waxa ay ku tusaysaa in aadan adigu nafsad ahantaa ku qanacsanayn Field kaas, markaas samee wax yaalo kale oo aad jecesahahy kuna Faraxsantahay, waayo wax kasta oo ku farxad geliya ama motivation kuu sameeya waxa ay ka qaybiyiin Guusahada, “This is the secret to be a millionaire.”

6. Baro sida loo Horumariyo Naftaada, Qodobkan waxaan ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Soo Qaatay Maqaalkaygii Kan Ka Horeeyey Waxaanad Ka Heli kartaa Hadaadan Shabkadaha sida aynu ogsoonahay wadada loo maro in aad ku noqotid Millionair mahan Tartan, iyo orod , balse waa sida marathonka. waxaad u baahntahay wakhti aad ku dhistid naftaada ama aad ku noqotid millionaire. maa han oo kaliya millionaire nimadu habeen inta aad seexatay oo aad ku soo toostay iyadoo jeebkaaga ama account gaaga ay ku jirto 1 million dollar. wadada lagu noqdo millionaire waa process soconaya. sidaas

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

daraadeed hadii aad rabtid in aad gaadhid Goal kaas waa in aad ku dadaasahaa sidii aad ku baranlahayd kuna horumarinlahayd naftaada wakhti kasta. mar kasta oo aad joojisid in aad naftada baratid waxa aad joojisay korintii naftaada, barashada aad baranaysid waxayaalo kala duwana waxa ay important u tahay nataada.

7. Yeelo Hadaf iyo ujeedo khaas ah oo dhaqaale, qodobkan waxaan ugala jeednaa in aad noqotid qof Muuq leh oo meel

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

higsanaya, xisaabtamaya, oo ujeedadiisii ahayd in uu Millionaire noqdo markasata ku dadalaya in uu rumeeya nafiiisana ku la xisaabtamaya, analogy yar ayaa waxa ay ahayd "Hadii aanay Goals kaagu hadayn waxa aan maskaxdaada u diraysaa fariin Madow".

8. Raad raac Dakhligaaga iyo Kharashkaaga, qodobkan runtii waa qodob aan odhankarno wuxuu asal u yahay qofkasta oo doonaya in uu noqdo Millionaire,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waana mid aanay dadka badankoodu samayn. just sii wakhtigaaga qayb kamida ugu yaraa 10 -15 minute oo aad dib ugu raad raacdid Dakhligaaga iyo Kharashaadkaaga, ujeed kuna waxa weeyaan in ay Habit kuu noqoto Xisaabtanka Naftaada, ma rumaysantahay akhristow in badanaa dadku ay kulumiyaa 30 minute bishiiba sidii ay u maamulilahaayeen Dakhligooda? hadaba tan waa mid wacan, balse waxay wakhtigooda ku lumiyeen meel khaldan. hadaba tan saxdaa waxa weeyaan in in dadka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

madankoodu ay kulumiyaan ugu yaraa 30 minute bishiiba si ay bills is kaga bixiyaaan. yes dadka badankoodu way maamulikaraan Dakhligooda iyo Kharashkoodaba only marka ay bills ka bixinayaan. hadaba hadii aad rabtid in aan noqotid Millionaire waa in aad ka dhigataa habit sidii aad u maamulilahayd Lacagtaada. sidaan haga sare kusoo shegnay , looma baahna intaa lacag kusoo gasho loomana baahna inta kharash aad gashid, balse waxaa muhiim ah in aad dabeecada Master ku noqotid.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

"If you cannot manage your wealth, you cannot be rich.".

9. Iska ilaali bidcada ama khuraafaadka Diinteena islaamka ka hor imanaysa, dad badan ayaa arimo khuraafaad ah oo dambaab ah isku daya in ay ku doonaan Hanti taas oo akahiradoona iyo aduunkoodaba ku noqota Cadaab, hadaba maxaa lagaaga baahanyahay in aad ogaatid qodobadan:-

a) Lacag kuma iibsankartid Farxad,waa run hadii adan Lacag haysan kaama dhigayso

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

mid faraxsan, waayo lacagi farxad ma kaynto.

b) Lacagtu maahan wax kasta,tani waa waano aan u dirayo dadka Faqiiriinta oo aan rabo in ay ogaadaan in aanay lacgi wax ba ahayn, balse loo baahanyahay in uu qofku la yimaado yaqiin iyo iimaan,

10.Baro sida loo ikhtiraaco Fikrado Cusub “Innovation” taas oo ay ka mid tahay in aad yeelatid ku dhac, go-aan qaadasho, Kalsooni ilaahay aad ku kalsoonaatid in ilaahay ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

siiyay asbaabihii kaa caawin lahayd in aad la timaadin ikhtiraac ama fikir cusub oo noloshaada wax ka bedela.

7: TALLAABOOYIN LAGAMA MARMAAN U AH GUULAHA IYO GANACSIGA

Horumarka teknoloojiyaddu cusub waxa uu keenay in meesha laga saaro afkaartii hore ee ahayd in dadka taajirka ah ay yihiin oo qura dad da'weyn oo waayo badan usoo dhabar

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

adaygay waayaha nolosha iyo isbedbedelkeeda.
Waxaa hadda dunida jooga jiil cusub oo dhalinyaro ah oo hadana noqday dadka ugu hantida badan dunida, waxaa ka mid ah 29 dhalinyaro da'doodu ay ka hooseyso 40 sano, waa sida ay qortay majaladda la yiraahdo Forbes, dhalinyartaa waxaana ka mid ah , Dustin Moskovitz, Mark Zuckerberg, Albert von Thurn und Taxis, Scott Duncan, Eduardo Saverin, Huiyan Yang, Fahd Hariri, iyo kuwo kale oo aad u farabadan oo ku guuleystay ganacsigooda.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Hadaba waxaan idiin haynaa talooyin waxtar u leh ganacsata yaryar ee doonaya iney guulaha waaweyn ka soo hooyaan ganacsigooda.

1 – Yaree masaariiftaada kharashkaagana ha ku bixin waxaan nacfi lahayn.

2 – Sida aad ugu riyooneyso inaad hesho faa'idooyin baaxdleh waa inaad abuurtaa mashaariic faa'iidooyin yaryar oo degdeg ah laga heli karo.

3 – Dadka kale kaalmee, maashaariicda guuleysa waa kuwo dadka usoo gudbiya waxay u baahan yihiin.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

4 – Naftaada hala barbardhigin dadka kale, aamin inaad diyaartay guulo waaweynna aad soo hoyn karto.
5 – Ganacsatada waaweyn inta badan kuma taliyaan in guryo waaweyn la iibsado.
6 – Isku day inaad ka shaqeyso howsha waxyaabaha aad daneyso ka agdhow, firfircoonida iyo xiisuhu waxay ka mid yihiin tiirararka ugu muhiimsan ee guusha dhaqaale lagu gaaro.
7 – Mashruuca aad sameynaysaa ha noqdo mid xal u ah mushkilad jirta oo dadku ay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

doonayaan in laga xalliyo, waxsoosaar kasta oo guuleysta baahi loo qabo ayuu ku meelmaray.

8 – Si aad hadafkaaga u gaarto waxaa lagama maarmaan ah inaad qorshe u dajiso, waa inaad naftaada u dajiso tallaabo qorsheysan oo dhanka maaliyadda ah.

9 – Waxsoosaarkaaga waa inaad la kali noqoto oo uu jiro wax adiga kuu gaar ah oo aad kaga duwan tahay badeecada kale ee suuqa taalla, waa in wax kastaaba uu kuu noqdo heersare.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

10 – Xirfado cusub yeelo, Illaali sugnaanshiyahaaga shaqo oo joogtee, mar kastana ku dadaal inaan ka faa’ideysato khibradaha dadka kaa aqoonta iyo garaadka roon ee waliba gacansiga meel wanaagsan ka gaaray.
Ugu dambeyn, waan hubaa in talooyinkan oo kaliya aaney kugu filnayn sidaa darteed ay lagama maarmaan tahay inaad kor u qaaddo dadaalkaaga talooyinkaa sarena sida ay tahay aad ugu dhaqanto, waxaan hubaal ah inaad guul muhiim ah

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

oo ganacsiga ah aad gaari doonto.

Sagaal qodob oo guul ku gaadhi karto Guushu waa shay qof kastaa jecel yahay inuu Gaadho, balse waxa lagu kala duwan yahay Dariiqyada lagu raadiyo oo kaliya.
Cidda Guusha gaadhaa waa dadka hormoodka ah ee lagu daydo ama inta Badan lagu Hamiyo in la gaadho marxalada ay ku sugan yihiin.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

8: ASTAAMAHA AY LEEYIHIIN DADKA GUULAYSTA

1- Marnaba marmarsiiyo lama yimaadaan: Haddii aad dhab ahaantii raadinayso guul waa in aad joojisaa cudurdaarrada iyo marmarsiiyaha aad cuskanayso, waayo waxba kama faa'iidaysid balse dib ayay kuu dhigaysaa.

2- U roonaanta dadka kale: Dadka badiyaa nolosha guulo ka gaadhaa waxay wax u tareen dadkale, waayo heerkaa ay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

gaadheen kumay gaadhin kaligood ee waxay ku gaadheen caawimo uga timid dadka kale.

3- Shaqo aan kala go’ lahayn: Marka ay Iiibaanayaashu ama guulaystayaashu u socdaan inay xaqiijiyaan yididiilooyinkooda waxay u shaqeeyaan habeen iyo maalin si aan kala go’ lahayn, ma daalaan mana caajisaan ilaa ay xaqiijiyaan waxa ay raadinayaan, dadkani waxa ay toosaan habeenkii si ay u raadiyaan yididiiladooda isla markaana waxaad aragtaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

iyagoo subixiina arrinkan raad guridiisa ku jira.

4- Awood iyo karti saraysa: Hadii aad dib u raad gurtid taariikhda waxaad helaysaa in dhamaan guulaha la gaaadhay waqti kaste ay ku hareeraysantahay awood iyo karti aad u heer saraysa, taasi oo ka dhigtay in dadkii guulahaasi gaadhay ay marba marka ka dambaysa u sii dhawaadaan heerka ay hiigsanaayaan, iyaga oo isla markaasina awoodoodu sii kordhaysay.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

5- Mabaadiida: Waxa ugu wayn ee guulaha gaadhsiiyay dadkii nolosha hore guusha uga gaadhay waxa weeye mabaadiidooda, mabda'aagu waa waxa hore kuu socodsiiya kuguna caawiya inaad gaadhid yididiiladaa, noqo qof mabda' leh.

6- Iimaan adag oon la liijin karin : Cida guulaha waawayn u saaxiibka ahi iimaankoodu amaba waxa ay ka aaminsanyihiin yididiiladooda marnaba kama habaabaan, in

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

badan oo noloshooda ka mid ah ayay la kulmeen cid ka shakida, cid dhaleecaysa iyo cid wax xun ka sheegtaba, balse iskadaa inay arrintani cabsi galisee waxay kusii caawisay inay kusii adkaystaan yididiiladooda iyo shaqada oo ay kordhiyaan isla markaana wadaan ilaa ay ka gaadhaan guusha ay rabaan.

7- Sababta ka dambaysa guusha: Cid kasta oo guul gaadhay waxa ka dambaysay sabab ku dhalisay inay heerkaa gaadhaan, sababtaas oo dhimbil ka dhex shida maskaxda

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

qalbiga iyo ruuxda qofka si aanuu u fadhiisan ilaa iyo uu gaadhayo heerka uu tiigsanayo una dhaafo dhibaatooyinka kaga imanaya arrinkan sababtiisa.

8- Baadhis mug dheer: Dadka guulaystaa waxay aad u darsaan amaba u baadhaan waxa ay rabaan inay gaadhaan oo ay xaqiijiyaan si ay si fudud u rumeeyaan riyooyinkooda iyo yididiiladooda.

9- Garab marida dhibaatooyinka: Dadka guulaysta waxa ay si fudud u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

garab maraan dhibaatooyinka soo waajaha, oo ma noqdaan qaar halkaas ku joogsada oo yididiilooyinkooda kaga hadha dhibaatadaa ay la kulmeen awgeed balse waxay sii galisaa xamaasad iyo awood dheeraad ah oo ay hore ugu socdaan.

Sidee ku timaadaa Guushu

Qof kasta waxaa ku beeran hammi ah in uu guul gaadho, ruuxa bulshadu ku qiimayso sarraynta iyo karaamaduna waa kan laga arko guul uu ka gaadhay hawl uu u gacan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

qaaday ama si guud nolosha. Cilmibaadhis lagu sameeyey furayaasha guusha loo kaashan karo ayaan akhristayaasha u soo turjunay qodobbada ugu muhiimsan guushaas.

1. himilo cad: Sirta koowaad ee guusha noloshu waa in uu qofku dhigto ujeedooyin cadcad iyo hawlo qodobbaydsan oo uu doonayo in uu gaadho. Waxaa iyaduna muhiim ah in qofku ujeedooyinkiisa uu qoranayo u qaybiyo kuwo himilada dhow ah iyo himilo fog oo uu hiigsanayo mar dambe in uu gaadho. Waa in uu qoro jidka uu u marayo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

himilada dhow oo u kala horreysa sida ay ugu kala muhiimsan yihiin, kadibna uu qoro jidka uu uga wareegayo haddii jidkaas hore xidhmo, waxaa iyaduna marar badan muhiim ah in hawsha uu doonayo in uu ku guulaystaa ay lahaato waqti xaddidan oo uu qorshaysto in uu ku gaadho, si haddii waqtigaas uu ku gaadhi waayo u dib uga fikiro waxa qaldan iyo sida uu ku sixi karo.
2. Go'aan qaadasho: Waa in go'aamada aad qaadanaysaa ay noqdaan kuwo fulintoodu kaa go'antay, haddii bilowga hore

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aad shaki badan ka qabto fulitaanka go’aankan, ha qaadan go’aankaas ee dib uga fikir.
3. Awoodda saddexan: Jaran-jarrada guushu waxa ay ka bilaabataa kaabadda koowaad oo go’aan qaadasho, laakiin ha illaabin in go’aan aad ku gaadho hawlqabashadeeda uu ka horreeyo saddex arrimood oo ah, in aad marka koowaad garato awooddaada, dhaqaale, jidheed, aqooneed iyo karti kasta oo hawshani u baahan tahay in aad leedahay. Haddii aad taa hubto waxaa iyaduna muhiim ah in aad garato waxa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aad ku wanaagsan tahay, tusaale ahaan haddii aad ogtahay in aad saxafi ku habboon tahay oo hiwaayaddii hawshan iyo aqoonteedii aad buuxin karto ha isku hawlin in aad noqoto taliye milateri si aanay ugu fashilmin gaadhisteeda ama ugu yaraan waqti badani kaaga lumin, arrinta saddexaad waa in aad yeelato hal-adaygii go'aanka aad qaadanayso iyo samirkii aad ku sugi lahayd natiijadiisa, haddii aad saddexdaas hayso waxa aad qaadan kartaa go'aan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

adag oo guushaada fure u noqda.
Awoodda saddexan ee qofka looga baahan yahay in uu ku dhaqmaa waa;
– Oofin: Oo looga jeedo in qofku marka koowaad garto yoolkiisa iyo halka uu beegsanayo iyo weliba jidka uu u marayo.
– Hal-adayg: Oo ah in qofku uu ka soo gudbo marxaladdi fikirka oo uu si ficil ah u gudo galo hawsha uu doonayo ka midho dhalinteeda.
– Dul-qaad: Waa habka keliya ee uu qofku kaga gudbi karo caqabadaha ka hor yimaadda,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kuna sii adkaysan karo dhibta ka sokaysa gaadhista hadafkiisa.
4. Curin: Arrimaha waayo-aragnimada lagu ogaaday waxaa ka mid ah in curintu ay ka mid tahay furayaasha ugu muhiimsan ee guusha noloshaada aad ka gaadhayso. Curintu waa qofka oo mar kasta maskaxdiisa miira si ay u keento afkaar iyo qorshayaal cusub. Waa qofka oo hal-abuur yeesha mar kasta oo uu hawl ka faraxashana ka fikira hawsha kale ee iyadana ay tahay in uu guul ka gaadho.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

5. Qaladaadka oo wax laga barto: Qaladaadku ma’aha dhammaadka nolosha, mana ah dhammaadka rajada guusha, balse keliya khaladku waa dugsi ay qasab tahay in qof kastaa maro oo loo baahan yahay in wax laga barto lagana faa’idaysto. Qaladaadka aad gelayso inta aad ku gudo jirto dadaalka aad himiladaada ku gaadhayso waa in aad u qaadataa waayo-aragnimo iyo dersi aad ku cibro qaadanayso. Iska jir in qalad aad mar gashay uu kugu noqdo boog abid ku daba socota, si joogto ahna aad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

u xasuusato, waayo taasi waxa ay kaa hor istaagaysaa in aad dadaal dambe gasho oo cabsi ayaad ka qabtaa in aad haddana qaldanto. Qaladka ka qaado wixii duruus ku jira, sida in aad fahamto sida uu ku yimi iyo sida ay tahay in aad mar labaad isaga ilaaliso, intaa waxa ka soo hadha waa qaladka in aad dhabarkaaga dambe ka tuurto si aanad dib ugu xasuusanba.

6. Ka faa’idaysiga waqtiga iyo nidaamintiisa: Arrimaha muhiimka u ah guusha nolosha waxaa ka mid ah in qofku uu yaqaanno sida ugu fiican ee uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waqtigiisa ugaga faa’idayn karo gaadhista yoolkiisa nolosha. Waa in aad waqtiga u aqoonsato in uu yahay hanti qaaliya oo Alle hibo kuu siiyey, sida saxda ahi waa in aad ka dhigato raasamaal aad ka faa’idaysato, sababna u noqda guul aad gaadho, haddii kale waa seef laba-af-leh oo adiga ayaa uu ku jari.

7. Rajo-san: Rajo samaantu waxa ay ka mid tahay tilmaamaha muhiimka ah ee lagu garto ruuxa guusha gaadha. In qofku khayr rajaystaa waxa ay qalbigiisa ku beertaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

rajo fiican iyo kalsooni uu naftiisa u qaado, waxa aanay ku dhiirri gelisaa firfircoonida iyo shaqada, arrimahaasina dhammaantood lagama maarmaan ayaa ay u yihiin guusha uu ruuxu doonayo in uu noloshiisa ka gaadho.
Guushu waa maxay?
Guushu waa himilo iyo hiigsi aad leedahay oo aad gaadho, mana ahaa mid ku timaada xaglo laaban, sahal, fikir gaabni, hami yari iyo samir yaraan toona. Guusha waxa sargooya hanka, hiigsiga iyo humaagyada mustaqbaleed ee qofku meel

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhigtay, markaas waxay ka dhigantahay, nin waxa guul u ah ayaa mid kale u ah bilawga hayaanka guuleed ee uu hiigsanayo.
Guushu waa wax cayiman waa wax qofkasta yaqaan, waa wax cidi ku sifoowda ay dadka kaga tilmaamantay astaamo gaara, loona xiisoodo raacida dariiqa ay mareen, iyadoo arintani jirto hadana ma jirto wado qudha oo guusha kugu hagta waxa laga yaaba halka uu mid inaga midi u maro in ka kuxiga ka waayo, ama qofkasta iyo xaalkasta leeday dariiq u gaara.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Guushu maaha xoolo badan, maaha shaqo badan, mana aha mansab sare, balse guushu wa xasilooni Nafeed iyo daganaansho niyadeed, guushu waa wax qofka u sahasha inuu si niyad samana ugu dhex nooladoo bulshadiisa, waxa suura gal inad wakhti badan ku bixiso waxad u aragto guul wayn, balse qofkale uu ku arko qof tabcanaya Daal iyo dhib, tusale ahaan qof sabol ah, guusha u arka inu marun helo wax uu iskaga dabool bahiyaha nolosha ee kala dhadhanka duwan..

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Hadii arintu sidan tahay waxa laysku raacsan yahay in ay noloshu kala duwananshaha ku wacantay kuna micno fiican tahay, balse ay jiran wax yaabo lawadaago si nolosha iyo nafta loogu raro meel ay u aragto munaasib wakhti iyo xaalad go’an, loogana rero meel ay kuqanacday inay wajib tahay in laga baxo ama laga hayaamo, anoo ka duulaya Mabaadidan guud ee asaasiga ah waxan isku dayeya in aan ino so gudbiyo Astamaha ay ka midaysanyihiin dadka Guusha sameeya noockastoy yihiin..

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Wax ka baro Astaamaha Guusha

.....

1.Dajinta hami iyo hiigsi Isbadal jogto ah : dhaman dadka raba inay nolosha ka sameeyan Guul waxay naftooda ku qanciyan inuu isbadal waajib yahay, waxay hoos iyo korba dadka u codkoodu gadho ugu sheegan in isbadal loo bahan yahay, wax mararka qar dhacda in lagu arko qof qaldan balse wa wax nolosha ku caadiya, Nabi Muxamed (CSW), ayaa tusale fican kugu ah, iyo dhaman dadka nolosha horumarka ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

sameyey midkastood noloshisa badho.
2. In aanad mar labad sameyn khalad aad horay u sameysay, taasi micneaheedu maaha in hadii aad shey mar ku guuldareysato in aad mar kale ku guuldareysanayso, lakin waxay tahay in aad wax ka barato khaladaaddkaagi hore ee aad Khalad kaga oo aad wax ka barata, oo aanad ku si socan waa wadad guusha .
3.Humaag iyo Qanaco Isbadalku Noocu noqonayo: dhaman dadka nolosha ka sameeyey horumarka waxay ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

qanacsanayen inay gadhayan meel ka fican halkan ay joogan, dhaman waxay madaxa ku haystan sawr ka turjumaya nolosha ay hayanka ku yihin, waxay markad la shekaysto ama akhrido buugta taarikh nololeedkoda ka arkaysa Riyo wakhti ay sooo jeedan, taso adiga kula muqata hir balse isaga ula muuqata xaqiiq, wana ta dhaxalsisa adayga iyo gadhida noloshoda ay raban.
4. Dadaal iyo Karti dheerad ah: dhaman dadka macnaha sameeyey ee kugu xeeran haday noqoto shek iyo sharifba

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

midkasta wuxu goostay wuxu beertay, midkasta wuxu ku naalonaya habenkisa iyo malintisa intu gashaday, taasana waata dadka kala sareysisay,ee gulayste iyo guldarayste ka dhigtay

5. Samir iyo Dulqaad: u fiirso dadka wax ah ama aad farta ku fiiqdo ee noloshada ku xeeran, iyo dhaman dadka samaynta toska kule noloshena ma jiro qof Haben ku gadhay nolosha u gaadhay, mana jiro qof Saacadaha tiriyey si u badano nolosha uu rabo balse qofkasta wuxu huray wakhti dheer isagoo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

muujiyey samir iyo dulqaad xad dhaafa, waata sababtu Subanuhu (CSW) ugu laha Asxabigi ku yidhi alle noo bari in dadkan na Ciqabaya u naga kafiyo: Samra Ilma Yasiro Balantinu wa janee, taasi wa mancaha samirka iyo dulqadka. 6. Go’an iyo Xoog Sarid: ma jiro qof meel gaadhay oon dadka fikirkisa ku qancin, soo xasusto dhacdadii cajibka ahayd ee Subanihii (SC W), lagu yidhi Inader hubka dhig an kusino waxad rabto, Suldanimo, Xoolo, Hawen Quruxon, ee intu amusay u ku yidhi Wale hadi Dayaxa iyo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Cadceeda midba gacan laysaarayo inan ka tagayn waxa an ku tagnahay. dhaman dadki noloshan macnaha ku sameyey waxay ahayen kuwo ku adag waxay raban kuna qanacsan fikirkooda nololed.

7. Guulaha iyo wax soo saarka cusub ee manta la gaadhay waa riyadii shalay. Haddii aad u fiirsato waxyaabaha kugu xeeran sida dhismayaasha dhaadheer, maraakiibta,diyaaradaha, telefonada ,internetka iyo idaacadahuba waxay shalay ahaayen riyo ku jirta maskaxda

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

mid kamid kii daahfuray. Riyadadu waa meesha ay ka bilaabanto guul kastaba waa cunsurka ugu muhiimsan ee wax qabadka. Waxaa xusid iyada oo rayadeenu aanay xudud ahayn.

Wuxu yidhi Alber Ayniston : “Riyadu way ka muhiimsan tahay Aqoonta”

8. Arimaha ugu waaweyn ee guusha lagu gaadho waxaa kamida samirka, oo ah inaad adkaysi yeelato dhibatada oo aanad dagdagin Ilaahayna Qur,aankiisa wuxu ku yidhi “samra oo dhabar adayga oo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ilahay ka baqaa waad guulaysan doontaane” markaa Illahay guusha wuxuu ku xidhay waa samir. Waxa kale oo Illahay aayado farabadan kaga hadlay samirka abaalkiisu in u yahay jano iyo khayr. Marka aan ka hadlayno horumarka maadiga ahna waa inaad u samirto shaqada aad hayso ee aad ku hiigsanayso guusha aad rabtid.

Xaglo Laban Guul laguma Gadho

Adu hays xaqiirin intaa aanay dadka kale ku xaqiirin, Isku kalsoonow oo niyadada waanaji Illahayna taalo saro mar kasta .

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

9. Ha u ogolaan dadka kale inay hoos ku dhigaan.Waxa hubal ah in aad soo martay noloshaada guuldarooyin faro badan . si kastaba ha ahaate ha u ogolaan dadka kale in ay ku niyad-jabiyaan ama ay kugu tilmaamaan in aad tahay qof aan waxba qabsan Karin. Ma jiro qof waada wanagsaan qof waliba khalad wuu sameeya,hadaba ku dhiiri geli naftaada in aad tahay qof wax qabsan kara guulaysana.
10. Ha ka baqaan guusha: hadi aad ka baqato wadada guul darada ayaad ku dhacaysa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waligana lagama yaabo in aad heeshid.
Guushu ku imaan mayso aada radsaanaya .
Waad guulaysan insha Allah
11. In qofku baadho waxyaabaha uu u baahan yahay inuu sameeyo si uu u guulaysto iyo waxyaabaha ka hor istaagi kara guusha.
12. Guushu ku so dhawayn mayso roogna ku dadin mayso aada samaynaaya .
13. Talabda u horeysa waay adagtahay lakin aada fududaynaya .

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

14. Noqo qof jira, noqo qof la soo higsaado noq qof samiir leh iyo dulqaad,
15. Adu hays xaqiirin intaa aanay dadka kale ku xaqiirin,
16. Isku kalsoonow oo niyadada waanaji Illahay taalo saro mar kasta .
ugu danbayntii dadkani waxay sifo u leeyin Ababulka iyo Adeegsida Awooda dadka kale, ama degaanka ku xeeeran, waxay inta badan isku dayan inay abuurtan jawi la saxiba kaso ku gacansiya marka ay hoos marto, sida Lataliyayaal dacada, iyo cidkasto ay u arkan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

inay gacan kasinayso gadhida halka ay raban, waxanay isku dayan inay yareeyan Cadawgooda wakhtiga bilawga ama awood daaraan yahay. Wax ka baro hababka looga hortago guul-darrada Talo bixin.

-Waa inuu joogteeyaa oo ku dadaalaa hayaanka uu ugu jiro guusha.

-Waa inaad hubisaa kolba inaad hayso hilinka iyo toobiyaha aad u marayso guusha.

-Waa inaad u samirtaa hadimooyinka ku gadaaman

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

jidka guusha oo hadii aad dhib la kulanto aad ka gudubtid .
-Waa inaad niyad samaan iyo talo saarasho Alle aad la timaadaa.
-noqon dadka markay Gusha gadhana, had iyo jeer llaahay u mahadnaqa oo ka dheeraadaa kibir iyo wixi lamida , una tafoxaydataa sidii u guulo kale u gaadhi lahaa.
-Waxa la isku raacay in guusha dhabta ah ee waaraysaa ay tahay guulaysashada if iyo aakhiroba iyo raali ahaanshaha Rabbi.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

-Sida ilaahay (SWC) ku sheegay, qofka guusha dhabta ah gaadhay inuu yahay “qofka la dhaafiyo naar ama aan galin naar, Janaduna hoy u noqoto, kaas ayaa guulaystay.
-Muhiimadu waxa weeyaan, inaad ogaato micnaha iyo ujeedada aad u nooshahay ee aad aduunyada u joogto, hadaad u fiirsato dadka nolosha aan fahansanayn waxaad arkaysaa iyaga oo nolosha ka quustay, wax guul ahna ka 4 Sababood oo kaa Hortaagan Guusha
Waa maxay guushu?

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

guushu waa helida dhamaan waxaad ka doonayso nolosha amase fulinta qorshihii aad hore u dajisatay, islamar ahaantaana guushu waa adoo kaca aroortii adoo dareemaya farxad oon aan dareemayn cidhiidhi iyo diiqad. Sida loo noqdo qof guulaysta nolosha

9: CAADO OO HAL UBUUREYAASHA GANACSI EE GUULAYSA AY KA WADA SIMAN YIHIIN

Qof walba waxa uu jecelyahay inuu hormar ka gaaro wax walba

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

oo uu ku howlanyahay haddii ay ahaan laheyd goob-shaqo ama hal abuur uu la yimid. Iyada oo ay sidaa jirto hadane qof walba kuma guuleysto inuu ka miro dhaliyo yoolasha noloshiisa, oo waxaa jira caqabado badan oo ka hor imaanaya qofka. Ganacsiga ayaa kamid ah meelaha dadka ay guul darro weyn kala kulmaan marka ganacsigooda uu bulaali waayo ama uu gaari waayo kobacii ay rabeen, waxaad sidoo kale arkeysaa ganacsi muddo sanooyin ah furnaa oo hadane

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aan dhaafin halkii laga soo bilaabay.
Guusha ganacsiga ama guul darada kuma xerna dukaanka ama dhismaha ay alaabtu taallo, balse waxa ay ku xerantahay hal-abuuraha ganacsigaas kala wada ee maamula. Sidaa darteed qormadan waxaan idin-kula wadaageynaa 10 caado (dhaqan) oo ay wada simanyihiin hal-abuureyaasha ganacsi ee guuleystay si dadka ganacsiga ku jira ama jecel in ay ganacsi bilaabaan uga faaideystaan oo ay isku dayaan in

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

caadooyinkaas ay iska dhex raadiyaan.

HADABA WAA KUWAN (10-ka Caado)

1. Guul darada waxa ay u arkaan wadada guusha loo sii maro: Mararka qaar waxaa dhacda in qofka uu ganacsi bilaabo isaga oo doonaya inuusan wax qasaara ah la kulmin. Markii uu qasaaro arkana ganacsiga ayuu xeraa oo waa uu joojiyaa, balse hal-abuurayaasha guuleysta sidaas ma aha. Waxa ay aaminsanyihiin in guuldaradu ay tahay marxalad u baahan in looga gudbo dhabar

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

adeyg iyo dadaal, waxeyna u arkaan guul daradu (caqabadaha) in ay taagantahay albaab walba oo ay guul ku jirto.
2. Waxa ay isku xeeriyaan koox dhiiran oo karti leh: Ma jiro qof kaligiis wax-walba qabsan karo, hal-abuurayaasha guuleysta waxa ay isku-xeeraan oo ay soo dhaweystaan dad howl-kar ah oo dhameystira waxa ka dhiman sidoo kalena kor u qaada sumcadda ganacsigooda.
Dadka ay soo dhaweysanayaanna uma fiiriyaan diin, jinsi, midab ama qolo midna, balse waxa ay ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

eegaan afkaarta, kartida, hufnaanta iyo sida qofka ay soo dhaweysanayaan uu ganacsigiisa guul u gaarsiin karo.

3. Waxa ay is-barbar-dhigaan halkii ay shalay joogeen & halka ay maanta joogaan: Hal-abuurada ganacsi ee guuleysta waxa ay dib u milicsadaan marxaladahii ay soo mareen si ay u bar-bar-dhigaan marxaladda ay hadda joogaan. Daqligii bishii hore ayey barbar-dhigaan daqligii bishii hore, qarashaadkii sanadkii hore ayey barbar-dhigaan qarashaadka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

sanadkan. Isbarbar dhiggaas waxaa uga soo baxa halka ay talaabta xigta u qaadi lahaayeen. Soomaalida waxaa ay ku maahmaahdaa ‘markii aad tagtadaada taqaano ayaad timaadadaada u talin kartaa’

4. Waxa ay jecelyihiin in ay jawaab helaan: Hal abuureyaasha ganacsi ee guuleysta ma daneeyaan kaliya in ay macmiil badan helaan oo ay faaiido ka sameeyaan, balse waxa ay daneeyaan in ay macmiisha ka helaan jawaabo ku saabsan adeegga iyo badeecooyinka ay iibiyaan,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

arrintaas waxey suurogelineysaa in hal abuuraha mar walba uu sii hormariyo adeeggiisa. Haddii aadan macmiilka weydiin sida uu arko badeecooyinka iyo adeegga shirkadda berri waxa uu heli doonaa qof kale oo weeydiiya cabashadiisa kadibna tixgeliya.

5. Ganacsiga uma abuuraan in ay ganacsadaan: Hadafka 1'aad ee hal-abuureyaasha guuleysta ma aha in ay ganacsadaan oo ay lacag abuuraan balse waa in ay baahi daboolaan. Waana waxa ugu badan ee ganacsatada Soomaaliyeed ay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ku qaldamaan, qofka inta uusan bilaabin ganacsiga waxaa muhiim ah in uu isweeydiiyo horta maxey dadku u baahanyihiin? Marka aad ogaato waxa ay dadka u baahanyihiin ee aan suuqa oolin ayaad dabooli kartaa baahi jirta, sidoo kalena aad ka sameyn kartaa lacag badan.

6. Xiriir fiican ayey sameystaan: Hal-abuurayaasha ganacsi waxa ay wanaajiyaan xiriirka ganacsatada lamidka ah iyo kuwa ka duwan, waxa ay isku dayaan in ay xiriir fiican la yeeshaan ganacsatada ay isku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

adeegga bixiyaan ee ka jira wadamada caalamka si ay waayo aragnimo iyo garab uga helaan. Xiriirkaas ayey aaminsanyihiin in ganacsigooda uu ku hormari karo.
7. Fikradaha kale ma xadaan/ koobiyeeyaan: Hal-abuureyaasha ganacsi ee guuleysta waxa ay la yimaadaan afkaar cusub, waxa ay daboolaan baahi suuqa ka jirta, waxa ay suurageliyaan wax aan horay suura-gal u aheyn. Hal-abuurayaasha guuleystay ma xadaan fikradaha dadka kale iyo ganacsiyada jira, waxeyna u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

arkaan wax anshax darro ah oo dhaqaalaha dalka hoos u dhigaya.

8. Hantida ay ka sameeyaan ganacsiga dib ayey ku kobciyaan ganacsigooda: Hal-abuurayaasha guul dareysta hantida ka timaada ganacsigooda waxa ay ku dhameeyaan in ay ku masruufaan qoysaskooda, halka kuwa guuleystayna ay dib ugu celiyaan ganacsiga iyo ama ganacsiyo kale si ay hormar ganacsi u sameeyaan. Waxeyna aaminsanyihiin in ganacsiga uu yahay sida dabka oo kale haddii

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhuxul iyo qoryo lagu shubinna uu dami doono marka ugu dambeyso.

9. Waa dad dhiirrogelin badan: Hal-abuureyaasha ganacsi ee guuleysta waa dad dhiirrogeliya dadka kale, shaqaalahooda ayey u mahadceliyaan oo ay dareensiiyaan in ay wax weyn qabteen marwalba oo ganacsiga uu gaaro guul weyn oo la taaban karo. Erayada mahadsanid, howl fiican baad qabateen, la'aantiin waxba lama gareen IWM ayey ku dhahaan shaqaalahooda maalin walba. Dadka talooyinka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

iyo hal-abuurnimada ganacsi wax ka weydiiyana waa ay u hagar baxaan. dadka kalena waxa ay ku dhiirrogeliyaan in ay bilaabaan ganacsi iyo howlo wax ku ool ah.

10. Waa dad wax aqriya: Hal-abuure walba waa wax aqriye wanaagsan. Haddii uusan aqrin fikradaha dadka kale ma ogaan karo in fekerkan lagaga horeeyay iyo in kale. Hal abuuraha guuleysta xafiiskiisa lagama waayo buug ka madax-banaan shaqadiisa ama shaqadeeda. Afkaarta dadka kale ayey afkaar kale kala

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

baxaan. Bil Gates sanadkii waxa uu aqriyaa 50 buug, halka Warren Buffet oo ah ninka labaad ee ugu hantida badan dunida 80% maalintiiba waxa uu waqti la qaataa buugaagta.

Si kasoo horjeeda sida dad badani aaminsanyihiin ma jiraan dad aan guulaysan amase guuldaraystaa, hase ahaatee waxa jira dad haysta fursadaha lagu guulaysto kuwaasi yaqaana sida looga faa'idaysto. Waxa kaloo jira dad haysta fursadahaas balse aan garanayn sida looga faa'iidaysto.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Waxa kaliya eed ubaahantahay inaad qabato si aad guul ugaadho waa inaad si sax ah u qabato waxa dadka guulaystay sameeyeen.
markaad akhridid warbixintan hoose waxaad si buuxda u heli doontaa dhamaan fikradihii ay xambaarsanaayeen dadka guusha gaadhay taasi oo kaa caawinaysa inaad guul gaadho.
Maxaan u guulaysan waayay?
Hadaad dhab u doonayso inaad guulaysto waa inaad si qotodheer ufahantaa fikradaha guud ee cayimaya fursadahaaga

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kaana dhigaya qof aan guulaysan.
Dadka guulaystaa waxay ka fogaadaan fikradahaan curyaamiyay dad badan sidoo kale waa inaad adna ka fogaataa:

- Fikradaha khiyaaliga ah: Fikradaha khiyaaliga ahi waa fikradaha aan saxda ahay eed naftaada ama wax ka aaminsantahay.
- Fikradaha khiyaaliga ah waxaa ka mida “waligay shaqo ka heli maayo wadanka” ama “tan waxba ma dhexyaalaan”.Fikradaha

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

khiyaaliga ahi waxay si toos ah uxadidaan fursadahaaga dhabta ah iyo guushaadaba.Ka takhalusida fikradahaas iyo inaad waxbadan ka ogaataa waa hawsha ugu muhiimsan ee ay tahay inaad qabato haddii aad u jeelantahay guul. Fikradaha khiyaaliga ahi ma xadidayaan oo kaliya fursadahaaga balse waxay burburin karaan noloshaada.

- Adkaysi la’aan: Kawaran adigoo leh waxbarasho tayo sare leh iyo xirfado aad u sareeya hadii aad ka rajo dhigto guusha kadib markaad guul

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

daraysato hal ama laba jeer? dadka kaliya ee nolosha ku guulaystaa waa dadka adkaysiga leh kuwa aan ka hadhin haddafkooda iyo hiigsigooda illaa inta ay ka helayaan waxay doonayaan xataa haday waxkastaa lidi ku noqdaan iyo xataa haday guul daraystaan waxbadan.

- Isbadal la’aan:

Isbadalku waa awooda lagula qabsado xaaladaha guud. Waa awooda layskugu dayo shay kale ama habkale hadii uu hab kuu shaqayn waayo.Isbadalkaaga oo bata

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxaa badanaya laqabsashada aad la qabsanayso xaaladaha kala duwan taasi oo badinaysa fursadahaaga guusha.

- Qorshe la’aan: hadii aanad hadaf iyo qorshe lahayn ogow inaad noqonayso qayb ka mid ah dadka kale qorshahooda. Hadii aanay kuu qorshaysnayn inaad noqoto hogaamiyaha tiimka ama kooxda aad wada shaqaysaan qof kale oo kamida kooxdiina ayaa qorshaysan doona sidoo kale hadii aanay kuu qorshaysnayn inaad ku dadaasho shaqada mushaharka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

sare leh ogow in qof qorshaystay uu kaa buuxin doono. Wuxuu kaa buuxin doonaa booskaa mushaharka sare leh, lacagta badana isagaa qaadan doona, isaga ayaana caan noqon doona halka aad ka noqon doonto daawade.

- qorshuhu wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa guusha.

10: SIDEE KU NOQON KARTAA QOF GUULEYSTA

Qof kasta oo inaga mid ahi waxa uu la tacaalayaa carqalad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

noloshiisa haysata oo ka hortaagan waxyaabo badan oo uu qabsan lahaa, taas oo ay dad badan aamisan yihiin in ay tahay wax aan xal loo heli karin ee ay iska samraan; taas oo ka lumisa awoodii fikir iyo ficil ee ay kaga takhalusi lahaayeen carqaladaas haysata, iyaga oo ka laabta gacmaha daawadana meesha ay u kaxaysa carqaladaasi. Waxa kaliya ee ay tiigsadaana waxa uu noqdaa calaacal joogto ah iyo cudur-daaro uu qofku ku xeero noloshiisa oo dhan. Maad ilowday inay noloshu tahay imtixaan iyo shaqo, taas

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

oo mararka qaarkood ah hal xidhaale ay ka guulaystaan in yari!.

Inta badan dadyowga guusha ka gaadhay noloshan ee ka tagay dhaxaltooyo ma guuraan ah oo ay intifaacsadaan malaayiin qof oo ku kala nool daafaha dunida, kuwaas oo aanu magacooda iyo waxtarkooduba aanu dhimanin ilaa marka ay dhintaan ka dib, iyaga oo ka waxtar badan kuwo badan oo helay waqti badan oo ay Dunida ku noolaadaan laakiin noqday rabshad wadayaal nololeed dadka ku xeeran dhiba,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

nafahoodana cadaab iyo cuduro joogta ah u horseeda. Ogsoonoow in Carqaladu ka mid tahay sunaha nolosha, waayo Rusushii iyo Nabiyadii (Naxariis iyo nabad galyo guudkooda ha ahaatee) Illaahay (S.W.T) soo diray waxay ahaayeen kuwo la kulma carqaladaha;kuwaas oo ka carqalado badnaa dadka ay la noolaayeen waqtiyadoodii. Dhibaatadu waxay inoogu timaada si aynu wax uga barano, uguna dabaqno nolosheena; dadka intooda badani waxay ku mashquulaan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhibaatada iyaga oo hilmaama casharadii ay ka baran lahaayeen.
Carqaladuhu nolosha kama dhamaadaan se xal lagu dhaafo ayaa jira.
1: U fiirsasho iyo Falanqayn: In aad u fiirsato oo aad falanqayso carqlada ku haysataa waxay kuu sahli kartaa in aad si fiican uga bogato dhibta iyo xaga ay ka timid; deetana si fudud aad ugu siibi karto xiddidada, wax walba bilowga xalkiisu waa fahanka, haddii aanad nolosha fahmin waliga waad jahawareersanaan, haddii aanad fahmin shay aad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

isticmaali lahaydna waligaa ka faa'idaysan maysid.
Si aad wax u fahantana waa in aad falanqaysaa oo aad baadhitaan qoto dheer u gashaa.
2: Mar walba diirada saar dhanka wanaaga: Iska ilow in aad ku mashquusho dhibaatada carqaladi kuu horseeday; waayo taasi waxay kaa luminaysaa awoodii iyo kalsoonidii aad ku abaari lahayd kagana takhalusi lahayd isla carqalada; waxna kaga baran lahayd. Mar kasta oo aad dhanka wanaagsan ee iftiinka leh wax ka eegto;

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

horseed ayay u noqon kartaa niyad wanaag iyo in aad sii wadan karto halganka aad kula jirto carqaladaha noloshaada ku xeeran.

In aynu dhanka xun wax ka eegno waxay inagu sababtaa, in aynu awood u yeelan wayno helida xal aynu kaga gudubno isla carqalada. Mar kasta oo aad dhanka wanaagsan wax ka eegtaa waxay ku dhaxalsiinaysaa in aad hesho xalal kala duwan.

Cilmi baadhis (Research) ay samaysay Jaamacad ku taala Dalka Maraykanka ayaa tijaabo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ay samaysay ku ogaatay in marka qofku dhanka taban ee aan wanaagsanayn wax ka eegayo aanay suurto gal u ahayn inuu maskaxda ka shaqaysiiyo oo uu baadho xalal kala duwan si uu u helo xalka ugu haboon se kaliyaata uu dhan qudha wax ka eego, taas oo sabab u noqota in uu qofku samayn kari waayo xal ku haboon ka takhalusida carqalada ama uu qaato go’aan uu ka qoomaameeyo, halka dhanka kalena la ogaaday in marka qofku dhanka togan ee wanaagsan wax ka eego, uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

awood u yeelan karo inuu maskaxda ka keeno fikiro iyo xalal kala duwan oo u horseedi kara inuu kaga gudbo carqaldaha.
Illaahay waxaynu ka helna hadba wixii aynu ka filano wanaag iyo xumaanba, wanaaji filashadaada aad nolosha ka qabto.
3: Mar kasta Rejo yeelo oo ha quusan: Rejadu waa xanuun biiyaha dhibta iyo werwerka nafsiga ah, mar kasta oo aad rejo leedahay waad ka murugo yar tahay mararka kale. Quustu waa albaabka ugu horeeya ee

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

laga galo guuldarrada iyo werwerka joogtada ah, Rejadu waxay ku dhaxalsiinaysaa in aad lahaato calool adayg si kasta oo ay xaaladu u adag tahay in aad quusataana maaha dhaqan wanaagsan;
waayo ogoow in uu Alle ina faray inaynaan ka quusan Raxmadiisa, taasi waxay ina tusinaysaa sida ay muhiimka u tahay in la lahaado REJO si kasta oo ay u madowdahay noloshu, Ogoow in uu Habeen kastaba ka danbeeyo Iftiin maalmeed qurux badan, Dhibaato kastana ay ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

danbayso nolol fiican.
Carqaladu haddii aanay ku dilin waxay kuu noqon doontaa sheeko aad ka sheekayso maalin ka mid ah maalmaha noloshaada Aduunyo.
4: Baro Xirfada Xallinta Khilaafaadka: In aad barato xirfadani waxay kaa caawinaysaa in aad wajihi karto Carqalad kasta oo ku soo wajahda xalna u heli karto, aqoon in aad u lahaato xirfada noocan oo kale ah waxay kaa caawin doonta qaybo kala duwan oo noloshaada ah.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

5: Ka warqab Naftaada: Mar kasta oo aad kor u qaado ogaanshiyaha iyo ka warqabka naftaada, waxa aad u dhawdahay in aad ka guulaysato carqalad kasta oo soo wajahda naftaada. Dhibaatada ugu wayn ee aynu inta badan kala kulano carqaladuhu waa in ay hoos u dhigaan ka warqabka nafeed ee shaqsiga.
6: Baro Xirfado kala duwan: Mar kasta oo aad kor u qaado heerkaaga aqooneed ee aad korodhsato cilmi, waxa aad ka gudubtay oo kaa go'ay dabar ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

mid ah dabarrada Jahliga. Dunidan aynu maanta joogno waxa ugu wayn ee qofka lagu qiimeeyaa waa xirfdaha uu yaqaano; sababtoo ah waxa la ogyahay; qofba qofka uu ka xirfado badan yahay inuu ka xallin ogyahay dhibaatooyinka, noloshiisana awood u leeyahay inuu maareeyo.

7: Dhiirigali Naftaada: In aad dhiirigaliso naftaada mar walba waa shay aad ugu muhiim ah noloshaada iyo guulaha aad ka gaadhi karto, naftaada oo aad dhiirigalisaa waxay kuu horseedi

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kartaa hanaan nololeed oo wax-soo-saar leh.
8: Samayso Caawiye: Helida shaqsi kaa waayo aragnimo iyo aqoon badan waxay kuu fududayn kartaa in aad ka gudubto carqaladahaaga, qof ku caawiya oo ku siiya talooyin dhaxagal ah wuxuu kuu fududayn karaa ka gudbida carqalada, baadi doon oo ka ag dhawoow dadka aad bidayso inay noqon karaan kuwo awood u leh inay kula xalliyaan carqaladahaaga.
Awooda carqaladahaagu kaama wayna se adiga ayaa dooran

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kara in aad isku diciifiso oo aanad waxba ka baran; dhulkana kula gasho oo ay adiga ku burburiso noloshaadana baabiiso, ama aad wax ka barato kuna dabaqdo noloshaada oo aad ka dhigato kaabadihii figta sare aad ku gaadhi lahayd.

11: WAA MAXAY GUULDARRADA?

‘Ma jiro wax la yidhaahdo guuldarro. waa laba mid uun in aad guuleysatay ama in aad waxbaratay.’

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Guuldarradu waa cashirka ugu muhiimsan ee lagu barto wadada loo maro guusha maxaa yeelay qofku marku guuldaraystay waxaa uu bartay gafafkiisi iyo khaladaadkiisi uu ku guuldarraystay kadibna baaritaan ayuu ku samayni markay u soo baxdo ama u kala cadaato sabaabihii dhaliyay guuldaradiisa waa u ka weecan wadadii hore uu ku guul daraystay. waxa uuna qorshayn wado cusub taasi oo guul gaadhsiisa.
Sheeko xikmad leh: guuldarro

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Wiil: maxaa kuu suura galiyay in aad guulaysato ?
Guulayste: waxa ii suura galiyay go’aan saxan oo aan qaatay.
Wiil: go’aan saxsan sidee ayaad ku heshay ?
Guulayste: waxa aan ku helay khibrad iyo waaya aragnimo aan kasbaday.
Wiil: oo khibradda halkee ayaad ka heshay
Guulayste: waxa aan ka helay guuldarradaydii ama fashilkaygii hore.
Waa maxay dulucda sheekada ?

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

 ma dhihi karnaa guuldarradu waa xirfad ?
Hadaba adigu akhriste maad ka qaadataa guuldarradaada duruusta ku jirta. sida inaad fahanto sidey ku timid iyo inaad mar labaad isaga ilaaliso. hadii aad guul doonaysid waa in aad ka faa`iidaysatid duruursta guuldarrada ku jirta.

‘Ninka guul soo hoyn doona wuxuu ka faii`deystaa qaladaadkiisi hore wuxuuna isku dayaa in uu waddo tii hore ka duwan qaado.’

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Gaadhida guulahaad hiigsanayo waxaa ka horeeya guuldarooyin farabadan, caqabado iyo hadimooyin hadaba markay kaa horyimaadaan caqabadahaasi ha niyad jabin! hana quusan! Isku day in aad xaliso caqabad kasta si tartiib ah adiga ayaa guulaysaniye. ogsoonaaw guuldaradu ma aha in aad kuftid balse waa in aad diidid inaad kor u kacdid.
Guuldarradu waa jidka guusha ‘Kuuma suurragal aha in aad ka cabsatid guuldarrada waayo waa jidka kaliya ee kugu ridaya guusha !’

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Guuldarradu waa jidka ugu wayn ee lagu gaadho guusha waa hadii aadan quusanin iska ilaalisana niyad jabka. Bal aan kaaga sheekeeyo dadka taariikhda galay iyo guuldarrooyinkii markii hore ay la kulmeen iyo siday ay uga gudbeen.

ALBERT EINSTEIN

Albert Einstein wuxuu dhashay 14 march 1879kii wuxuu ku dhashay jarmalka hooyadii iyo abbihii waxaay ku dareen iskuul laakiin waxaa uu ahaa dibjir waxaa uu ku dhacay imtixaano

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

farabadan, macalimiintiisuna waxay maalin kasta ka caban jireen dabeecad xumadiisa iyo dibjirnimadiisa waxaa uuna hadalka caadiga bilaabay markuu afar jir ahaa. Yaraantiisi wax muu akhrin Karin ilaa uu toddoba jir gaadhay wiilkii yaraa ee sidaas u guuldaraysan jiray waxaa uu soo saaray qawaaniin cusub oo physics ah, wuxuuna sidoo kale soo saaray hubka casriga ah

ee loo ya qaano nuclear-ka, muuq-baahiyayaasha,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

computarada iyo aalado badan oo aan maanta isticmaalno waxay ka soo burqadeen aragtiyo fiisigis oo isagu la haa waxaa uu noqday saynisyahanka qarnigii tagay.
MICHAEL JORDAN
Waa ciyaaryahan kubadda kolayga caan ku ah gaar ahaan horyaalka (champion) loo yaqaan NBA, waxaana uu ku guulaystay lix jeer oo horyaalka NBA, shan jeer NBA MVP iyo afar jeer oo NABB all star ah, laakiin markii uu yaraa wuxuu la soo kulmay guuldarrooyin farabadan waxaa laga eryay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kooxdii uu u ciyaari jiray, marku dugsiga sare dhigan jiray taasina waxaay sababtay in uu muddo gurigooda qolka mid ah hoosta iskaga soo xidhdo kana soo bixi waayo, isagoo oohin miciinsanayo. Dhiirigalin naftiisa uu siyaay, dadka kalena ka helay ayaa maanta ka dhigtay ciyaaryahanka ugu caansan kubbada kolayga. Mar la waydiiyay siduu u guulaystay iyo sababtii ka danbaysay inuu guulaysto ayuu yidhi: ‘Waxaan soo guuldarreystay marar badan taasina waa sababta aan u guulaystay.’

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

HENRY FORD

Henry ford wuxuu noloshiisa ka bilaabay meel hooseysa in ka badan shan jeerna wuxuu sheegay in uu kacay oo uu ku guuldaraysatay hiigsigiisi. Dadaal iyo isaga oo quusan ayuu ku hantay inuu yeesho shirkada gawaadhida ugu fiican aduunka ee FORD soona saarta malaayiin babuur ah sanad kasta. wuxuuna guuldarada ka yidhi:

‘Guuldarradu waa keliyaata fursad labaad si aad mar labaad u bilawdid, balse markan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

xariifnimo dheeraad ah ayaa lagaa rabaa.’

Hababka Looga Hortago guuldarada

-Waa inuu joogteeyaa oo ku dadaalaa hayaanka uu ugu jiro guusha.
-Waa inaad hubisaa kolba inaad hayso hilinka iyo toobiyaha aad u marayso guusha.
-Waa inaad u samirtaa hadimooyinka ku gadaaman jidka guusha oo hadii aad dhib la kulanto aad ka gudubtid .

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

-Waa inaad niyad samaan iyo talo saarasho Alle aad la timaadaa.
-noqon dadka markay Gusha gadhana, had iyo jeer Ilaahay u mahadnaqa oo ka dheeraadaa kibir iyo wixi lamida , una tafoxaydataa sidii u guulo kale u gaadhi lahaa.
-Waxa la isku raacay in guusha dhabta ah ee waaraysaa ay tahay guulaysashada if iyo aakhiroba iyo raali ahaanshaha Rabbi.
-Sida ilaahay (SWC) ku sheegay, qofka guusha dhabta ah gaadhay inuu yahay “qofka la

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhaafiyo naar ama aan galin naar, Janaduna hoy u noqoto, kaas ayaa guulaystay.
-Muhiimadu waxa weeyaan, inaad ogaato micnaha iyo ujeedada aad u nooshahay ee aad aduunyada u joogto, hadaad u fiirsato dadka nolosha aan fahansanayn waxaad arkaysaa iyaga oo nolosha ka quustay, wax guul ahna ka 4 Sababood oo kaa Hortaagan Guusha
Waa maxay guushu?
guushu waa helida dhamaan waxaad ka doonayso nolosha amase fulinta qorshihii aad hore

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

u dajisatay, islamar ahaantaana guushu waa adoo kaca aroortii adoo dareemaya farxad oon aan dareemayn cidhiidhi iyo diiqad.

12: WAXYAABAHA KAA HORTAAGAN IN AAD GUUL GAADHO

1. CABSIDA

Dib maxaa idiin cellinay oo Hore idiin diday

Mar uun maad ku dayataan Khalqiga liibaanta doonayo.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

‘Waxa ugu weyn ee hortaagan guusha waa cabsida guuldarrada.’

Cabsidu waa dareen ka dhasha fikir taban badanaa, kaas oo u diida qofku inuu waxqabsado guulna ka gaadho hadaf uu leeyahay.
Hadaba cabsidu waa cadeyn been ah oo u muuqato run ama waa fikir taban.waa mala awaal kaasi oo kuu diida inaad guul aad gaadho,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Si guud fikirku kugu soo dhacayo markaad doonaysid in aad waxqabsato waa laba nooc oo kala ah:

1) Fikir taban

2) Fikir togan

Tusaale, hadaad rabto in aad ganacsade noqotid waxaa maskaxdaada ku soo dhici laba fikir ka koowaad waa fikirka taban oo isagu ku dhihi waad khasaari, waad guuldarraysani iyo adigu ganacsiga ku ma fiicnid iwm fikirkani waxaa uu dhaliyaa cabsida in aad mustaqbalka ka cabsatid. hadaad fikirka taban

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

maskaxdaada aad ku borogramiso waxaa ay gali caqliga gudaha caqligaas oo ka dhigo isagu wixii lagu celceliyo caado. caadadasina waxay kaa horjoogsani inaad guul gaadho. Waxaad na ku qanci in aadan wax qabsan Karin. Fikirka kalana waa fikir togan kaas oo isagu ku dhihi waad guulaysani faa`iidana waad kaheli iwm. fikirkanaa hadaad raacdid waad ka mira dhalini waxaad rabto. hadaba had iyo jeer noqo mid leh aragti togan haddii aad rabto inaad guul gaadho ha ka cabsan guuldarada. dadka ka cabsada

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

in ay guuldarreystaan marnaba ma dhandhamiyaan farxadda guusha.
"Haddii aad rabto inaan guul gaadho, ahdaaftaadana aad xaqiijiso, ha cabsan, balse waajah cabsida. Sida kaliya eed cabsida aad ku baabin kartaa, wa inaad marka hore iyada aad waajahdo. La saaxiib dadka kalsoonida badan, waxaad arki shay aad ka cabsatay oo ay iyagu horre u sameeyen, ka dib adigunae same say sameyeen. Mar walbana ogsoonow in cabsidu ay tahay fursadda geesiga lagu noqdo."

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

2. CUDURDAARKA

‘Cudurdaarradu waa musmaarrada loo isticmaalo in lagu dhiso aqalka guuldarrada.’

_Bill rechine

Boqolkiiba sagaashan iyo sagaal guuldarrooyin ku waxay ka yimaadiin dadka leh caadada ah in wax walba cudurdaar loo sameeya ama ku tiirsan hal shay oo kaliyaata.

Sheeho xikmad leh: sacaaga dil!

Waxaa jiray nin xigmad badan oo dadku talo iyo tacliin u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

raadsadaan. Wiil dhalin yaro ah ayaa u yimi oo wuxuu waydiistay xigmad waxtar u leh si uu wax uqabsado aduun iyo aakhiraba. Xigmad Badane wuxuu ka hubiyey wiilka in rabitaankiisa xigmaddu tahay mid ka dhab ah, markaas ka dib ayuu wuxuu la galay socdaal kuna yiri “Anaa ku tusaya waxa xigmaddu tahay.” Maalin lasocoy oo maalin kale lasocoy oo tuulooyin badan lamar. Kadib markii muddo la soconayey ayaa ninkii xigamadda badnaa wiilkii wuxuu u sheegay in uu raadinayo reerka ugu saboolsan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

tuulada ay Marayaan. Muddo kadib ayey arkeen guri dhoqosha ah oo aan mundulna ahayn cariishna ahayn oo aad ubaaba'san. Waxaa guriga bannankiisa ku xiran sac reerku leeyahay. Reerku waxay ka koob naayeen sideed qof siddeedaa qof waxay dhamaantood ka shaqaynayeen sacaas Mid lisa, mid caws u dhiga, mid daajiya, mid xerada u ooda iyo mid daryeel kiisa kale uqaabil sanba. Xigmad badane wuxuu wiilkii ku yidhi, "Caawa reerkan baan la bar yaynaa". Reerkii way soo dhaweeyeen martida u timi

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

iyaga oo ka cududaartay inay sacaas caanihiisa ma ahee aysan wax kale hayn Wixii ay haysteen ayey la wadaageen. Xigmada badane waxa uu reerka usheegay inay guuraynayaan oo socod dheer sugayo waana nabadeeyey reerka maadaama ay jar maadayaan. Intaan qofna kicin ayuu kacay

xigmad badane wuxuuna ku leexday xeradii mar kaas ayuu bilaawe ama mindi la soo baxay oo sacii gow racay. Wiilkii ayaa qayliyey oo yidhi “ saca kaliya

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ayaa reerku leeyahay ee sidee uga dili kartaa?” Xigmad badane dhag jalaq uma siin ee hawshiisa ayuu watay markaas ayey shanqar la’aan socod koodii wateen. Hal sano ka dib ayaa xigmad badane wiil kii wuxuu ku yidhi ina keen waan soconay naaye.Waxay yimaadeen tuuladii uu saca reerka kaga dilay marka ay meeshii yimaadeen ayaa wiilkii garan waayey gurgii in kastoo meeshu tahay goobtii uu ku ogaa gurigii doqoshka ahaa.Waxaa badalay guri cusub oo daar ah waxaana ku kor yaal

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

beer aad u weyn oo dadka jooga ay mashquulyihiin qof walibana hawl gacanta kula jiro. Gurigii ayey yimaadeen oo reerkii salaameen. Waa la isgartay oo la is waraystay. Reerkii waxay u sheegeen in subixii aad naga tagteen mid habaar qaba uu sacii ka dilay. In ay maalmo barooranayeen dariskuna usoo gurmaday. Tacsi ka dib waxay garowsadeen inay ka faaiidaysteen is badalka kuyimi naftooda oo wax hor leh qabsadaan. Waxay go'aan sadeen inay beer tabcadaan, maadaama ay qoys balaaran

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

yihiin abuurkiisana way dayn qaateen xilligii ugu horaysay markii beertu usoo go day ayey dayntiina iska baxsheen wixii u soo harayna gurigan dhagaxaa ku dhisteen. Waxayna qorshaysanayaan in midho badan usoo go’aan.Waxayna yiraah deen in kastoo markii hore aad ugu barooranay hadana waxaan ogaanay waxa hormarka noo diidan inuu ahaa saca. Markaas xigamad badane wiilkii wuxuu ku yiri “xigmadda noloasha lagu hormariyo waa adiga oo sacaaga dila. Qof waliba waxuu leeyahay sac ama

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

darbi uu jabin karo oo ka hor jooga in uu hadafkiisa gaaro. Taas oo qofku markuu fakaro kadib soo baxda oo khatar badan tusta sidaas darteed qofka fulaygaa cabsi galisa ka dibna fakarkiisa burburisa oo hormarka u diida Hadaba raadi saca hormarka kaa hor taagan kadib na gawrac si aad hormarka aad tiigsanayso ugaarto”

Cudurdaarda dadku ku cudurdaartaan waxaa ka mid ah  Cudurdaar xaalad cafimaad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

 Cudurdaar xaalad lacag la`aan ah

 Cudurdaar xaalad da` iyo wixii la mid ah

Cudurdaar xaalad caafimaad Waa adigoo ku cudurdaarta in aad jidh ahaan caafimaad kaagu dhanayn ama aadan lixdaadi lixaad adan lahayn sida inaa tahay curyaan, dhagoole, indhoole iwm. laakiin waxaas oo dhan cudurdaar kuu ma noqonayaa kaamana hor istaagi karaan inaad noloshaada horumariso oo aad ka mira dhaliso riyooyinkaaga mustaqbaleed qof heer sarana

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

noqotid. waxaad ogsoonaataana in aad tahay qof wax badali kara xaalad kasto oo aad ku sugantahayna aad guulka gaadhi kartid waxaad adigu rabto, adiga uun ayay kugu xidhantahay in aad horumar gaadhid.

DR.ZAKI CISMAAN

Dr.Zaki cismaan waxaa uu ahaa indhoole, curyaana ahaa laakiin ma saameynin cudurdaar xaalad caafimaad ah waxaana uu ku riyoonjiray inuu noqdo shaqsi muhiim ah waliba ah khadiib, imaam iyo daaci hadaba si uu uga mira dhaliyo riyooyinkiisa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waa inuu waxbarto waxaa uuna bartay quraanka kariimka wuuna xifiday. waxaa uu ku guulaystay inuu helo laba shahaado bachelor ah, master iyo PHD waxaa uu noqday waxaa uu ku riyoonjiray oo ahaa imaam, daaci waxaa kaloo uu noqday macalin jaamacadeed. Waxaa uu qoray afar iyo labaatan kitaab oo uu ka qoray dacwada, tafsiirka, ilbaxnimada iyo cilmiga bulshada. Indhoolihii curyaanka ahaa waxaa uu awooday inuu guulaysto riyooyinkiisa.
HELLEN KELLER

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Hellen waxaay ku dhalatay indha la`aan iyo dhaga la`aan waxaay go`aansatay in ay jaamacad dhigato go`aankeedina way fulisay waxay gashay jaamacad weyna ka qalin jabisay. waxayna noqotay macalimad jaamacadaha dhigto, qoraa, waxay

aliftay buugaag badan, siyaasada wadankeedana door muhiim ah ayay ka qaadatay. Hellen iyadoo dhaga la` indhoolana ah isma ay san dhibin ama ma cudurdaaran ee

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxaay ka mira dhalisay hankeedii.

NICK FOACK

Nick foack waxaa uu ku dhashay luga la`aan iyo gacma la`aan laakiin waa dhiirigaliye iyo guubaabiye caalamiya waxaa uun ka qudbadeeyo jaamacdaha iyo dugsiyada sare.Waxaa uuna yidhi

‘waxaa ah wax laga xumaado in aad aaminto in lagaa fiican yahay, waxaa kaloo ah wax lala yaabo inaad rumaysato in aadan waxba ahayn.’

Cudurdaar xaalad lacagla`aan ah

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Hadaad tiraahdo wax ma qabsan karo maxaayeelay ma heesto furiihii waxkasto furayay (lacag) waad khaldantahay. ilaahay wayne waxaa uu ku siiyay maskax aad waxaad rabto aad ku samaysan karto ee ka faaiidayso caqligaaga .
‘Jeeb madhani waligii muu hor istaagin inuu qofku gaadho horumar balse maskexda madhan iyadaa hawshaa qabata.’
_DR.ibrahim alfiky
‘Ma tihid sabool hadii aad tahay bilaa lacag waxa aad sabool tahay hadii aad tahay bilaa riyo.’

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

_Randy goge

3. QUUSASHADA

Quusashadu waa rajo beelid ama waa in aad faraha ka qaado waxaad rabtay in aad guul ka gaadhid adigoo u aanaynayo in aad marar badan aad ku fashilantay. waana dabar adag oo qofka uga xiran maskaxda kaas oo u diidayo in uu dhaqdhaqaaq xor ah sameeyo in uu fekero, kadibna dhaxalsiisa in uu aamino in uusan ahayn wax jiro. Sababta koowaad ee qofku u guulaystaa waa isaga oo aan marnaba quusan kuwo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

guulaysato waa kuwa waligood aan quusanin.
Sheeko xikmad leh:marna ba ha quusan!
Waxaa jiray nin beeraley ah oo beer weyn lahaa. ninkaas beertiisa dhowr jeer ayuu ku qasaaray markii danbe wuxuu go`aansaday in uu geed weyn oo beertiisa ku ag yiil inta hoos fariisto uu ka fakaro wixii uu beertiisa ka yeeli lahaa madaamaa uu dhowr jeer khasaaray. isagoo geedka hoos fadhiya oo ka fekeraya halkii uu ku dhaqaajin lahaa ayuu wuxuu isha la raacay quraanjo oo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

geedka jirida kasoo koreysa oo markay xoogaa socotaba soo dhacda. qoraanjadu ma quusato oo mar waliba ay soo dhacdo wey ku celisaa koritaanka geedka. aakhirkii quraanjadii waxaa u suurto gashay in ay geedkii dusha ugu baxdo oo gaarto halkeey rabto. ninkii halkaas wuxuu ka qaatay cashar oo wuxuu ogaaday wax walboo loo sabro in la gaari karo. sidaas ayuu beertiisi dib ugu noqday ilaa uu aakhirkii ka gaaro guusha waxaana uu noqday maalqabeen wayn.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

“Qaar badan oo guuldarraystay waa kuwa aan ogsoonayn sida ay ug dhawaayeen guusha marka ay faraha ka qaadeen.”
_Thomas Edison
Mar walba oo ay waddo kaa soo xidhanto macnaheedu maaha innaanay waddo kale furnayn, dabcan way kuu furan tahay, waxay se kaaga baahan tahay baadhid

iyo baadigoobid. Noqo biyo oo kale, biyuhu iyagoo socda haday dhagax ku soo beegmaan, dhinac ayay ka maran, hadii ay dhinacyadu ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

xidhmaan na, dhagaxa dushiisay maran, hadii ay meel wal ba kasoo xidhantana, dhagaxa hoostiisay ka dusaan, ka ogow naftaada quus, waayo quustu waa albaabada isku dayga soo xidh xidha.
“Marnaba maad guuldarreysan illaa aad joojisid isku dayga.”

_Henry Drummond
Waa adigoo qorsha aad maanta qaban lahayd barri u dhigatid naftaadana aad ku maawayliso yididiilo been ah. Dib u dhigistu waa mid ka mid ah asbaababaha

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waawayn ee kuu diidan inaad horumar gaadho.
‘Marna dib ha u dhigin barri wax aad manta awooddo in aad qabatid.’
_ Benjamin franklin
Si guud tala daydu waa in marna bari la samayn wax aad maanta sameyn kartid dib u dhigistuna waa tuuga wakhtiga. mustaq balkaaguna waxaa uu ku xiranyahay waxaad maantay sameeyso.
5. GUULDARROYINKII HORE
Saynisyahano ku takhasuusay cilmiga bada xili ay samenayeen cilmi baaris ayay Libaax

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

baddeed ku dhex rideen taangi muraayad ah oo biyo ku jiraan kadibna wax kalooy ku dhex rideen taangigii kalluumo yar yar (shoox) oo aad u faro badan isla markiiba libaax baddeedkii intuu dabaashay ayuu weeraray kalluumadii yar yaraa gabina wuu wada cunay. saynisyanadii waxay dhexdhigeen taangigii muraayad adag, taangigina waxay ka dhigeen laba qaybood qayb libaax baddeedkii ayay ku

rideen qaybtii kalena kalluumo yar yar (shoox) oo cusub ayay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ku rideen. libaax badeedkii kalluumadii yaryaraa ayuu weeraray laakiin muraayadii ay ku dhex rideen taangiga ayaa ka soo celisay dhawr jeer ayuu weeraray, mar kasta oo uu weerarana muraayada ayaa madaxa kaga dhaceysay saacad kadibna wuu is dhiibay weerarkina wuu joojiyay. wuxuuna muraayada ka dhex arkaayay kalluumadii yar yar oo si xor ah u dabaalanayo. tijaabadan mudo saddex todobaad ayeey ku celceliyeen libaax baddeedkiina wuu laqabsaday in ay muraayad u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhaxeeyso wuxuuna joojiyay weeraradii. saynisyaanadii waxay ka dhexsaareen muraayadii labada qaybood u dhexeysay laakiin libaax baddeedkii muu san weerarin kalluumadii yar yaraa maxaa yeelay waxaa lagu tababaray in uu u dhexeeyo isaga iyo kalluumada muraayad. kalluumadiina si hor ah ayey ugu noolaayeen taangiga.
Dulucda cilmi baarista
Badi dadku waxaa ay is dhiibaan marka guuldarrooyin fara badan la kulmaan sidii libaax baddeedkii waxa ay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

aaminan ama ay rumeeystaan ineey guulaysan Karin madaamooy guuldarrooyin farabadan la kulmeen. waxaana maskaxdooda ku xirma dabar adag oo u diida ina ay guul gaadhaan. hadaad rabtid inaad noloshaada guul ka gaadho iska illaali dabarada guuldarrooyinka ka dhasho.

6. AQOON DARRADA

Aqoon darradu waa shayga ugu horeya ee kuu diidan inaad nolosha guul la taaban karo aad ka gaadhid waxna aad ka badashid noloshaada si aad dadka dhexdiisa magac iyo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

maamuus aad ugu dhaxyeelato. Hadii aadan aqoon aadan lahayn ma gaari kartid hadafkaaga iyo qorshe aad dajisatay. aqoontu waa furaha horumarka waana sheyga lagu kalo garto waxa naftaada horumarinayo oo aad guul ku gaadhaysid iyo guuldarrada .

Sheeko xikmad leh: Beerole Iyo Dhagaxaan
Waqti waqtiyada ka mid ah ayaa nin beeralay ah oo ku nool wadanka Bangaladesh doonay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

inuu beertiisa qoto waqtigii gu’ga, isla markii uu bilaabay shaqadii qodaalka ee uu qalabkii iyo cagaftiiba galiyay ayaa meel beerta badhtankeeda ah ayay cagaftii ku istaagtay oo ay qodi kari wayday, ninkii oo yaaban ayaa ka soo daadagay cagaftii deetana eegay waxa joojiyay, waxba laakiin indhihiisu may qaban, ka dib wuxuu ula tagay gacantiisa oo uu ku qoday, waxooga markii uu qoday ayaa waxa kaga soo baxay sanduuq! farxad ayuu kala wareegay oo isla markiiba si dag dag ah ayuu u furay, mise waaba dhagaxaan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

madmadow oo ka buuxa, isaga oo niyad jabsan ayuu iska xidhay sanduuqii oo uu dhinac iskaga leexiyay. Naftiisa ayuu ugu sheekeyey “kolay anfac kale ma lehee shimbiraha ayaad kaga ceshan beertu markay kuu baxdo.” hawshiisii ayuu dib u bilaabay oo uu dhamaystay. In muddo ah markay ka soo wareegtay ee ay beertiina baxday midhihiina bislaadeen ayay shimbirihii u soo diyaar garoobeen inay cunaan, ninkiina difaac ayuu galay oo dhagaxaantii uu sanduuqa ku ogaa ayuu la soo baxay oo uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ku kala caydhin jiray maalin walba. Isaga oo xaaladii ku jira oo maalinba dhagaxaanta badh ka mid ah ku shiida oo ku caydhiya shimbiraha ayaa uu nin soo maray waddo beerta dhinaceeda marta, waxa si kadis ah hortiisa ugu soo dhacay laba dhagax oo madmadow, intuu istaagay ayuu kor u qaaday oo uu eegay, mise waaba Dahab! Ninkani waxa uu ahaa nin dahable ah oo ka ganacsada dhagaxaanta macdanta ah sida Dahabka, Daimond-ka iyo IWM. Ninkii wuxuu gartay in labadan dhagax ay yihiin dahab waxaanu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ku leexday beertii ninkii beeroolaha ahaa ee uu dhinac marayay, wuxuu salaamay ninkii, salaan ka dib wuxuu ku yidhi “dhagaxaantan ma adigaa soo tuuray” wuxuu ugu jawaabay ” haa, oo waxaan ku caydhinayay shimbiro weerar ku haya beertayda.”intuu dhoola cadeeyey ayuu ku yidhi “xabadiiba iga sii lacag dhan $5000.” Intuu qoslay ninkii beerlayda ahaa

ayuu si kaftan ah u yidhi “Maya” isaga oo moodaya inuu ninkani

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

la kaftamayo. Ninkiiba jeebada ka soo saaray $100,000 oo midiiba kaga iibsaday $50,000 wuxuuna u sheegay inay labadan dhagax yihiin Dahab, isla markii uu intaas u sheegay ayuu oohin qabsaday oo uu yidhi “Sanduuq dhan ayaan haystay laakiin waxaan ku kala filqay afarta jiho aniga oo shimbiro ku caydhinaya labadan oo kaliya ayaa ka soo hadhay.” Haddii uu maanta sanduuqii buuxay haysan lahaa intee in leeg oo lacag ah ayuu heli lahaa?

7. KA FIKIRIDA WIXII TAGAY

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Marka wax dhaceen wey dhaceen dib ha u eegin, hore uga soco hadafkaaga ka xiga hana ku mashquulin waxii tagay maxaayeelay waxaa aay kugu dhalinaysaa in aad ka cabsatid mustaqbalka kugu soo fooda leh.cabsidaasna waxaay kuu horseedaysaa fashilka ama guuldarada.
Sheeko xikmad leh: direewal waxaa jiray oday aad u jaclaa inuu noqdo direewal. odaygii ma uusan galin dugsiyada lagu barto direewalnimada si uu u barto direewalnimada laakiin isga ayaa iska bartay wadida

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

gaadhiga laba cisho ka dib intuu bartay inuu wado gaadhiga. odaygii waxaa uu go`aansaday in uu safro magaaladii ku xigtay oo u jirtay 30 km markiiba gaadhii ayuu dhaqaajiyay ilaa iyo magaalada uu doonayaay in uu tago markuu kala bartanka socdo ayuu maqlay hoon xaga dan be ka yeerayo. Waxaa uu fiiriyaay muraayad haadki waxaa uu arkay baabuur badan oo ka danbeeyso odaygii waxaa uu ku mashquulay in uu eego muraayad haadka mudo dhan isagoo ka cabsi qaba in baabuurtu xaga danbe ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhacaan. waxaa uuna ilaaway in uu fiiriyo muraayada hore nasiib daro odaygii gadhigiisi waxaa uu ka baxay haadkii oo wuu rogmaday odaygiina halkii ayuu ku naf baxay.

8. SAAXIIBKA XUN

Saaxiibka xun waa cadawga koowaad ee kuu diiddan inaad horumar gaadhid waxaana uu kugu saameeyaa si dhib yar dhaqamada xun xun uu leeyahay sida cabida sigaarka, khamriga, cunida jaadka, cunida doroogada iyo wax kasto oo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

naftaada mustaqbalkeeda u keenayo dhibaato. saaxiibka xun waa sidda cuf is jiidadka dhulka oo kale. bal ufiirso tusaale han hadaad qalin kor u tuurtid waxaa dhulka ku soo celinaayo oo u diidan inuu kor aado waa cuf isjiidadka dhulka sidaas oo kale saaxiibada xuni wax aay kuu diidayaan inaad gaadhid halkaad hiigsanaysid waxayna kaa dhigayaan fadhiid aan kor u kicikarin. Hadaad rabto in aad guul gaadho wax aad rabtana ka mira dhaliso waa in aad ka fogaataa saaxiibada xun xun ama iska dayso

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

saaxiibtinimadooda. Lana saaxiib dadka wanaagsan ku waas oo leh rajo wanaagsan. “shimbir shimbirkiisuu la duulaa.”
_murti soomaaliyeed
Helida saaxiib wanaagsan waa mid ka mid ah guulaha lagu gaadho halganka nolosha ku dadaal helida saaxiib wanaagsan. Hana la saaxiibin qof xun. Si uun noloshaada halis u galin !
Sheeko xikmad leh:
Saaxiibtinimo
Bari baa waxaa jiri jiray labo wiil oo saaxiibo ah, oo la kala

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

yidhaahdo cali iyo xasan maalin maalmaha ka mid ah waxay tageen duurka ballantoodu waxay ahayd inayna kala cararin hadii uu midkood arko bahal. xoogaa markay socdeen ayaa wuxu xasan arkay shabeel. markaasuu intuu cararay ayuu geed dushii koray. cali markii uu shabeelkii arkay ayuu intuu dhulka seexday, iska dhigay qof mayd ah shabeelkii intuu cali uriyay ayuu iskaga tagay. xasan markuu arkay inuu shabeelkii

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

tagay ayuu u yimid cali, markaa suu ku yidhi, “saaxiibow, in uu shabeelku dhegta wax kuugu sheegaayay ayaan arkee, muxuu kuugu sheegay?” Cali intuu dhulka ka soo is taagay ayuu ugu jawaabay, “wuxuu igu yidhi, saaxiibadaada duurka kaaga caraaraya ha la saaxiibin. saaxiibtinimadaadan ma doonaayo ee iga fogaaw.”

9. BALWADA

“Waxaad barato waa baaskaa.” balwadu waa wax naftu la qabsatay oo ay mudo ku celceliso sida magaca ku cad waa BAL_WAD waana waaxaad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

muddo wadid. balwadu waa laba nooc

 balwad fiican sida isboortiga, wax akhrista iwm

 balwad xun sida cabida sigaarka, qaadka iwm.

Balwada xun waa mid ka mid ah asbaabaha waa weyn ee kuu diidan inaad noloshaada isbadal lataaban karo ka gaadho.balwada xun waa shay si dhibyar lagu bilaabo laakiin ay adagtahay in la iska deeyo. Hadaba si aad hiigsigaaga iyo himiladaada u gaadho iskaga fogaaw balwad xun sameysana

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

balwad fiican taas oo horumar aad ku gaadhaysid.
Faa`iido darada balwada xun
 Naftaada ayay waxyeelaysa xaga caafimaadka
 Wakhtiga ayaad ku luminaysaa
 Dhaqaalahaaga ayaa hoos u dhigaysa
 Hadafkaaga ayay caqabad ku noqonaysaa.
 Waxay kaa dhigaysaa mid gabo kaalintiisi bulsho.
_Murti soomaaliyeed

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Dooriga tubaakadu adeer waa wax kuu darane
Dabkan aad cuntiyo qaacu wow daaanno feeraha e’ Sidii daamur buu kaaga dhegin daabka xuunshade e’ Dibnaha iyo afkaa waxay ku noqon dagal haruushada e’ Daqayada ma naaxaan nin cunay shay darooga lehe Abbateydka iyo wuxuu kaa dilaa gaajo diidaha e Waxay duubiyadu kuu ekaan diriq sidiisiye
Diif iyo xanuun baad u tahay dagaanti maandhow e`
Abwaan cabdirisaaq xirsi suldaan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

10.RAALIGALINTA QOF KASTA

‘Ma aqaan furaha guusha, laakiin furaha guuldaradu waa isku dayga in qof waliba la raaligaliyo.’

_Bill cosby

Sheeko xikmad leh: abbo, wiil iyo dameer

Bari waxaa is raacay aabo iyo wiil uu dhalay waxayna wada fuuleen dameer si ay suuqa ugu tagaaan horay Markaay muddo wada fuushanaayeen ayaa waxaa ka soo hor baxay niman. nimankii ayaa ku dhaga hadlay oo ku yiri “ waa maxay labadan doqon ee dameerka miskiinka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ah laba kuwada fuushan” odaygii ayaa isla markiiba ka dagay dameerka oo hogaanka u qabtay si uu wiilkiisa ugu wado markuu cabaar ku waday ayaa waxaa ka soo horbaxay gabdho. gabdhihiina waxeey ku yiraahdeen “bal eega wiilkan doqonka ee aabihii ka wayn lugaysinayo isaguna dameerka fuushan.” Intaas ka dib wiilkii ayaa ka soo dagay dameerka odaygii ayaa koray

dameerkii. markaay muddo socdeen waxaa la kulmay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhalinyar dhalinyarradiina waxaay ku yiraahdeen “waligeen maanan arag odaygan oo kale wiilkiisa yar lugeeysiinayo isaguna dameerka fuushanyahay.” Odaygii ayaa ka soo dagay dameerkii wiilkiisana u sheegay in labadooduba ayna wada korin. dameerkuna kaligis u socdo markay muddo saddexdooduba isgarab socdeen ayaa waxaa ka soo horbaxay odayaal. odayaashii ayaa hadana ku dhago hadlay oo ku yiri “waa maxay dadkan aan garanaynin sida dameerka loo isticmaalo.” Markii ay suuqi

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

soo gaaraan oo ay fadhiisteen ayuu wiilkii yaraa aabihii waydiiyay “aabo maxay dadku wax in ooga sheegayeen?” odaygii ayaa ugu jawaabay “wiilkaaygi aan jeclayoow waxaan ku barayay cashirka nolosha ugu mihiimsan kaasi oo ah hadii aad istiraahdo dadka wada qanci ama raaligali aadan raligalin Karin.
‘afkaarta khaldan ee dadku ku sheegan ayaa ka hortaagan guusha.’
_Yaxye yaasiin xasan
11.ADKAYSI LA’AANTA

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Waan kari waayay, wakhtigaa dheeraaday iyo way adkaatay waa erayada ugu badan ee aad ka maqli dad ku guuldarraysta howl ay hayeen dadkani waa kuwa aan laheen adkaysi iyo dulqaad waxayna is dhiibaan guusha markay ugu harsantahay talaabo kaliya mana ku sabraan dhibaatooyinka soo wajahayo .
Sheeko xikmad leh: adkaysi la’aanta
Maalin ayuu Eygu u tegay Libaax oo ah boqorka Xayawaanka, waxaana uu ku yidhi Boqor waxaan doonayaa inaad iga bedesho magaca Ey

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

maxaa yeelay wuu xun yahay. Libaaxii ayaa ku yidhi “Maxaad ku ogaatay ?’ Eyga ayaa yidhi “ Dadka ayaaba isku caaya, oo ka xun ku yidhaa Ey” Libaaxii ayaa ku yidhi adigu khaayin ayaad tahay magacan ayuun baa kuu qalma. Eygii ayaa ku yidhi horta maad

itijaabisid! Ka dibna Libaaxii ayaa u dhiibay waslad hilib ah, oo uu ku yidhi ii hay ilaa berii subaxa. Eygii ayaa habeenkii gaajooday oo kolba dhinac ka eega wasladii hilibka ahayd.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Markii waaggi baryay ayuu yidhi magacayga Ey, ma mid ka wanaagsan ayaa jira, maxaan gaajo iskaga eegi ? Maya. Ka dibna wuu cunay.

Dulucda sheekada

Dulucda sheekadu waxaa weeye adkaysi la’aantu in eey kuu horseedayso guuldarrada sidii eygan haleeshay. hadii eygu dulqaadan lahaa ama adkaysan lahaa uunsan cuneen wasladii hilibka ujeedada uu rabay wuu gaadhi lahaa magacana waa laga badali lahaa. Dadka badi waxaay is dhiibaan marka ay u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhawyihiin in eey guusha hantiyaan .

12.HURDADA BADAN

Hurdada nin badsaday bulshada ma hago horay u socod iyo hal hays ma noqdo hubaal ma hirdiyo halkii la raboo horumarka wuu hantaaqa

abwaan dhinbiil

sheeko xikmad leh: nin seexdu sicii dibi dhalaa

habeen habeenada ka mid ah ayaa laba nin ay u dhalayeen labadoodii sac ayaa intey labadii sac foolanayeen uu seexday midka mid ah labadii nin. labadii sac midna wuxuu dhalay weyl

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

midna dibi. subaxnimadii markii la soo toosay ayuu kii soo jeeday sheegtay inuu siciisu yahay midka dhalay weysha midkii seexdayna loo dhalay dibiga markay isqabsadeen oo look ala gar qaadayna waxaa weyshii loo xukumay kii soo jeeday.

13.CAAJISKA

Caajisku waa awood darro ka timaada maskaxda taas oo qofka ka dhigaysa mid aad u liita oo daal ama culays dareema maskax ahaan iyo jidh

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ahaanba, sidoo kalena aan awoodin inuu shaqo qabto kana caga jiida. Dad badan oo ku kala nool qaarado kala duwan ayuu caajisku ka reebay qayrkood oo uu ka hor istaagay inay gaadhaan guul ama se hadaf yeeshaan Qof kasta oo uu caajisku haleelo waa mid rajo beel ku dhaco oo mar walba maskaxdiisa buuq ku furanyahay, cabsi badan iyo murugana hadhaysay. Dhallinyaradan danbe ee Soomaalidana waa dhibaatada ugu badan ee haysata qayb ka mid ah, kana hor taagan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

yoolkoodii iyo hadafyadii ay gaadhi lahaayeen.

laakiin ma noqon mid munaasiba, markale ayuu dib ugu
noqday si uu u sameeyo kii labad, dadaal badan kadib mushiinkii labaad wuxuu noqday mid munaasiba waana laga aqbalay, laakiin dawlada jabaan ayaa diiday saddex sanno oo kale ayuu daraasadii sii waday, aadna u dadaalay, illaa ay dawladii jabaan ka aqbasho, laakiinse isagu ma awoodi karayn inuu warshad isaga u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

gaara samaysto waayo lacag ku filan ma haysan, laakiin mudo kadib warshaddii wuu sameeyay, hadana wakhtigii dagaalkii labaad ee aduunka ayaa warshadii la duqeeyay oo way burburtay, hadana afar sano oo danbe ayuu diyaarinay sidii uu warshad kale u samayn lahaa illaa uu ku guulaysto inuu dhiso, hadana waxaa dhacay dhul gariir oo warshadii way burburtay. lait Honda isma dhiibin mana quusan, intaa kadib wuxuu sameeyay shaagaga, waxaa kale oo u sameeyay mootooyin, markii ay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dadku arkeen mootoyinkii aad bay ula dhaceen, taasi oo keentay inuu dalab badan helo, wuxuu helay in ka badan 28 dalab isbuuc gudihii wuxuu daahfurkiisi ku wargaliyay shirkado badan oo jabaan ku yaala, waxayna ka dalbadeen wax fara badan, wuxuu gaadhay inuu helo abaalmarinta daahfurka ugu fiican ee jabaan bixiso, intaa kadib ayuu bilaabay inuu sameeyo gawaadhida Honda taas oo dunida ku baahday, wuuna xaqiijiyay riyadiisi habka ugu fiican oo aad riyadaada ku rumeenkartid waa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

in aad hurdada ka kacdidid oo aad baraarugtid kuna samirtid carqalad kasta oo ka hor imaanaysa.
Riyo kasta maalin ayay rumoowdaa waa hadii lagu dadaalo in laga mira dhaliyo bal kaalay aan kaaga sheekeeyo riyooyinkii rumoobay tooda ugu caansan taas oo ah riyadii martin luther king ee aheed ‘waxa aan leeyahay riyada ah maalin ay afartayda caruurahi ku noolaan doonaan qaran aan loo eegayn midabkooda ee loo eegayo dadnimadooda’ martin luther king waxa uu ahaa nin

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

madoow oo la halgamay siduu u joojin lahaa cunsuriyadii dalka maraykanka ka jirrtay taas oo lagu haynjiray dadka madowga ah, xiligaa dadka madowgu maraykanka wax xaquuq ah oo la sheegi karo ku malahayn. dadnimadaba waa loo diidanaa oo loo

ma aqoonsanayn in ay la simanyihiin caddaanka asalkoodu yurub ka soo jeedo, loo ma oggolayn in ay galaan meelaha dadka cadi joogaan sida huteelada iyo maqaxiyaha,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

basaska iyo tareennada waxa ay ka fadhiisan jireen halka ugu dambaysa, ma ay dhigan jirin dugsiyada cadaanku dhigtaan waxayna ka shaqayn jirreen shaqooyinka hoose waxa kaloo ay daganaayeen xaafado gooni ah Xaaladu iyadoo sidaas ah ayuu martin luther king halganka qabtay waxuuna iska duway wixii dhiig daadin lahaa waxaa uu doortay inuu xaqiisa ku dhacsado mabda nabaddeed ee laga dhaxlay halgamaagi hindiga ahaa Gandhi. sidaas na waa ku rumeeyay riyadiisi ahayd in cansuriyada maraykanka laga

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

tirtiro. waa uuna ku guulaystay in maraykanka cunsiriyadaas laga tirtiro. maantana waxaa maraykanka madaxwayne ka ah barrack obama oo ah nin madoow ah waana ninka rumeeyay riyadii king.

IKHTIRAAC

Dadka wax soo saaray waxay la hayeen riyooyin aad u fog oo ay ku hamiyi jireen iyo fikiro in ay wax ku soo kor dhiyaan aduunka hadaba si ay caalamka wax ugu soo kor dhiyaan, waa ay u daadaalen habeen iyo maalinba, u adkaysteen caqabadaha ka hor imaanayay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

iyo guuldarrooyinki ilaa ay ku guulaysteen. afkaartoodii Guulahaa iyo wax soosaarka cusub ee manta la gaadhay waa riyadii shalay. riyadaas oo ka dhaxguuxaysay maskax mid kamid daahfurayaash. Steve Jobs oo ahaa ninkii ikhtiraacay ama daahfuray Ipad, Itouch, Itunes, Iphone, dad waynaha aduunkuna ugu yeedhaan inuu yahay Thomas Edison-kii qarniga mar wax laga waydiiyay waxsoosarka ayuu wuxuu ku tiraabay hadalkan Cajiibka ah "Markaad soo koraysid, waxaa laguu sheegi doonaa dunidu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waa Sidan ay Hadda tahay dawrkaagu waa in aad sida ay tahay uun ugu Noolaato. laakiin, Noloshaasi waa mid aad u kooban; Noloshu intaa way ka balaadhan kartaa, hadii aad ogaato hal xaqiiqo oo aad u sahlan: ‘In shay kasta oo kuu dhow iyo waxkasta oo kugu

xeeran oo marka la isu geeyo aad ugu yeedho Noloshaadii ay sameeyeen dad aan kaa Caqli badnaynan; Aadna Bedeli kartid, Saameyn kartid, amaba aad dhisi kartid fekero iyo waxyaalo aad adigu iska Leedahay oo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dadka kale isticmaali karaan! markaas ayaad burburinaysaa gidaarka miridhka badan ee Aduunka sidaa aad ugu timi uun ugu Noolow waxaana ku soo geleysa neecawda: Nolosha si diiran u soo dhowee, wax ka bedel, wax ku biiri, horumari, Saameyntaadana ku xaradh dunida! Marka aad intan danbe barato sidaadii hore weligaa ma noqonaysid; waxaad tahay qof cusub" Waxaa kaloo uu yidhi waxsoosarku ma aha inaad wax cusub uun aad ikhtiraacdid ee waxaa weeyaan inaad wax uun ka badashid wixii hore ee jiray

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ama aad qurxisid wixii hore. mobilku wuu jiray laakiin anagu wax uun ayaan ka badalnay oo waxaan ka dhignay Ipad.
Sheeko xikmad leh: Sidee rabtaa in laguu xusuusto markaad dhimato?
Boqol sano ka hor, nin ayaa subax eegay Joornaalka, amakaag & naxdin, magaciisa ayuu ka aqriyay qeybta tacsida. Joornaalka ayaa si qaldan magaciisa loo ugu qoray qof kale oo dhintay. Wuxuu is weydiiyay ma halkanaan joogaa mise halkaa? Goortuu miyirkiisi helay, wuxuu is yiri bal ogow

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxay dadku ka yiraahdaan beenta laga faafiyay dhimashadaada meesha lagu qoray. Ma ooyayaan mise waa dabaaldagayaan? Joornaalada waxaa ku qornaa: “Boqorki waxyaabaha qarxa oo dhintay”. “Wuxuu ahaa ganacsadihi geerida” iyo waxyaabo kale oo ka sii xun. Ninkani wuxuu ahaa ninki hindisay dynamite (Qaraxdo awood badan, oo wax lagu qarxiyo). Markuu aqriyay “ganacsadihi geerida ayaa dhintay” wuxuu naftiisa weydiiyay ma sidan ayaa la ii xusuusan doonaa markaan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhinto? Dib ayuu isagu noqday wuxuuna go’aansaday inuusan rabin in sidan loo xusuusto. Maalintaa ka dib wuxuu bilaabay inuu nabada ka shaqeeyo. Ninkaa Magaciisu waa Alfred Nobel, waxaana maanta lagu xusuustaa Bilada Nobel Peace Prize.

TIRO
MAGAC
TAARIIKHADA
JINSIYADA
IKHTIRAAC

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Oriville and Wilbur Wright
1871-1948
American
Diyaarada
2
Thomas Alva Edison
1847-1931
American
Leydhka
3
Charles Babbage
1791-1871
English
Koombiitarka
4
Alexander Graham Bell
1847-1922

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Teleefonka

5

Abraham Louis Breguet

1747-1823

Switzerland

Saacada

6

John Logie Baird

1888-1946

Scottish

Tifiiga

7

James Harrison

1816-1893

Australian

Talaajada

8

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Guglielmo Marconi
1874-1937
Italian
Radiyooga
9
Edward Butler
1862-1940
English
Dugdugleeyda
10
David Bughes
1831-1900
British
Mikirafoonka
11
Richardh Gatling
1818-1903

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

American
Qoriga, xabada
12
Henry W Seely
1854-1908
Kaawiyad ledhka
13
Kirkpatrick Macmillan
1812-1878
Scotish
Baaskiileedka
14
E.G.Otis
1811-1861
Wishka fooqaqa
15
Lee De forest

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

1873-1961
American
Filimada
16
Hery Fox Talbot
1800-1877
British
Sawirada
17
John Froelich
1849-1933
American
Cagafta beeraha
18
Barthelemy Thimonnier
1793-1857
French

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Xarqaanka
19
Hans Lippershey
1570-1619
German
Teleskoopka
Jaan.1.2 dadka caalamka wax ku soo kor dhiyaya

13: SHEEKOOYINKA DADKII GUULSHA GAADHAY

Qof kastaa cidda uu doonaba ha noqdee waxaa lama huraan ah

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

inuu fashil dhadhamiyo siduu
ugu dambeyn u guuleysto,
waana wado adag oo
ay soo wada mareen badanaa
nolosha dadka ku guuleysta,
dadka
guuleystay heerka ay gaareen
kuma aaney gaarin waddo ubax
ku fidsan
yahay oo aan qodxo lahayn.

Hadaba, si aan waxbadan uga
fahamno sida ay guuldaraddu
ku noqoneysaa
wadada guusha loo maro
waxaan soo qaadannay hadallo
dhaxalgal ah oo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

laga hayo qaar ka mid ah dadka nolosha ku guuleystay heerkeeda ugu sarreysana ka gaaray:

Truman Capote

Waxa uu noolaa inta u dhaxaysay 1924-1984, waxa uu ahaa qoraa Mareykanka oo dhanka ruwaayadaha wax ka qora iyo actor caan ah.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Hadallada dhaxalgalka ah ee laga hayo waxaa ka mid ah:
” haddii aanuu
fashil jiri lahayn ma aanaanan ogaaneen qiimaha ay guushu leedahay, dhandhanka macaan ee guushu ay leedahay arki miyaysid illaa aad la daalaa dhacdo dhibaatada ay guuldaradu leedahay.”

Colin Powell

Wasiirkii 65aad arrimaha dibadda dalka Mareykanka 2001 – 2005 waxa uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ahaa qofkii ugu horreeyay ee
Mareykanka madow ah oo
jagadaa qabta.

Hadalladii dhaxalgalka ahaa ee
laga hayo waxaa ka mid
ah : “Guushu
waxay ka dhalataa xirfad
sarreeysa, dadaal dheeri ah,
fashilka oo wax
barto, daacadnimo iyo quus
la’aan, “Guushu waxay leedahay
tilmaamo
badan, waxa ku dhiirigelinayaa
waa isku dayga joogtada ah iyo
in
khaladaadka wax laga barto.”

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Donald Trump

Madaxweynaha hadda dalka Mareykanka oo ay xikmadihiisu iska kooban
yihiin ayaa isagana laga hayaa inuu yiri: “Mararka qaar inaad lagaa
adkaado waxay ku bartaa inaad lasoo baxdo xeelado cusub oo aad markaa ku
guuleysto, jabka aan ku dilin ee kusoo gaaraa waxa ay fure u qon kartaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

inaad raadiso wadeeqo cusub oo aad ku gaarto guushaada ballaaran.”

Bill Gates

“Way habboon tahay inaan guulaha aan gaarno u dabaaldagno, laakiin
taa waxaa kasii muhiimad badan inaan fahamno duruusta ay ka baraneyno
fashilka, ku dadaal inaan ku raaxaysato guushaada, laakiin marnaba ha

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

illoobin duruusta muhiimka ah
ee aan ka baraneyno fashilka,
waa arrinta
kaliya ee guushaada aad ku
ilaashan karto, meesha ugu
sarreysana ku
gaarsiineysa ugu dambeyn.”

Thomas Edison

“Anigu ma fashilmin waxaan
helay 10000 oo wadiiqo oo ii
shaqeyn

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waysay, noqo qof si wanaagsan u fakara, tijaabada kaa fashinta adduunyo
gaddoonkii maaha, waxa meesha yaallaa waa inaad aragta waddo aan ku habbooneyn in la qaado mar kale.”

Michael Jordan

Ciyaaryahan caan ah oo dhanka kubadda kolayga ah aad ugu caan baxay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

guulo aad u baaxdlehna ka gaaray: “Inta aan xirfaddeyda Sports ku jira
waan khasaaray marar badan 9000 oo isku day oo dhanka shabaqa ah ayaan
la fagay, 300 oo ciyaaroodna guuladarro ayaa na qabsatay, 29 jeer oo aan
guusha is lahaysiiyna waa lanaga adkaaday, marar badan ayaa fashilmay,
sidaa darteed ugu dambeyn waan guuleystay, ma jiro qof nolosha ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

guuleystay oo aan marar badan soo fashilmin, farqiga qofka guuleystay
iyo dadka kale u dhexeeyaa waa inuu isku dayga uu sii waday halka dadka
kale ay doontii ka daateen.”

Edwin Land

Inaad fashil ka baqataa waxay hoos u dhigeysaa awoodaada, hadaba

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

inaad guuldarada qaadato oo
aad ka barataa waxaad ogaataa
iney kaa
dhigeyso qof hal-abuur ah oo
inuu guul gaarana ay
fududahay.”

Frederick Skinner

“Fashilku markasta khalad
maaha, waa waxa uu habboon
ee aad sameyn
karo duruuf goonni ah, fashilka
dhabta ah waa inaad isku dayga
ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

joogsato, kuma khasbanid inaad
noqoto qof dhameys tiran,
waxaase muhiim
ah inaad isku day la timaaddo
duruuftu si kasta ha-u-xumaato
marnaba
isku dayga haka joogsan.”

Morihei Ueshiba

“Fashilku waa furaha guusha,
khald kasta waxbaan ka
barenaynaa, guul

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

lama gaari karo iyadoo aan la marin tijaabooyin fashil ah oo wax laga
barto, waa mabda’ guud oo ku abuuran aadanah, laakiin waxaan ku illownaa duraafaha jira.”

Winston Churchill

“Guushu waa inaad guuldarrooyin isdaba joog ah la kulanto, adigoon

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dadaalkaaga marnaba ka gaabin, haddii aad la kulmeyso guuldarrooyin is
daba jooga ah walina aad isku daygii waddo taas ayaaba ah guusha la
sheegayo.”

Ugu dambeyn, waxaa jira dadbadan oo aan ogeyn in guuldaradu ay tahay wadada loo maro guusha, marka aadse akhriso
xikmadahaa sare waxaa hubaal ah iney wax iska bedeli doonaan aragtidaada dhanka guuldarrada.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

14: SHEEKADII GUUSHA JACK MA ALIBABA.COM

Jack Ma waa aasaasaha iyo gudoomiyaha ugu sareeya ee shirkadda weyn ee Alibaba Group (Alibaba waa shirkadda weyn ee internetka wax lagaga iibsaddo ee uu fadhigeedu yahay dalka china) Jack Ma wuxuu dhigi jiray luuqada English-ta isagoo qaadan jiray lacag ka yar 10 dollar bishiiba.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Ka hor intii aanu bilaabin dhigista luuqadan, Jack Ma wuxuu aad u jeclaa inuu horumariyo habka uu ugu hadlayo luuqadan, waxaanu 45 daqiiqo u kaxaysan jiray baskiishiisa maalin walba Huteel u dhaw oo ay dadka dalxiisayaasha ahi ku soo dagi jireen si uu ula hadlo luuqadana English-tana iskaga dhiso. Jack Ma kumuu qanacsanayn shaqadiisa, waxaanu go'aansaday inuu u guuro dalka maraykanka, si uu u helo nolol ka fiican tii uu ku noolaa. Wuxuu bartay computer-ka iyo internet-

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ka aad baanu u jeclaa. Markii dambana wuxuu

aasaasay website-ka loo yaqaano ALIBABA.COM kaasi u saamaxay ganacsiyada iyo shirkadu ay ku kala ganacsadaan iskuna dhaafsadaan alaabta si online ah.
Alibaba wuxuu noqday ninka ugu taajirsan dalka china, hantidiisana maanta waxaa lagu qiyaasaa 21 billion dollar. Waxaa loo aqoonsaday inuu kamid

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

yahay 25 ganacsade ee ugu awooda badan qaarada eeshiya. Waayihii iyo Noloshii uu maray Jack Ma
Jack Ma muu haysan wax lacag ah oo uu ku bilaabo ganacsi. Wuxuu ku shaqayn jiray mushahar aad u yar. Waxaanu si dirqiya ugu biiray oo uu ugu guulaystay inuu ku biiro machadka tababarka macalimiinta. Intaa waxa dheer in wadanka shiinuhu aanu waqtigaa ahayn meel ku fiican in lagu noolaado ganacsina laga bilaabo.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Jack Ma dhaqaalihiisii iyo lacagtuu haystay sanadihiisii ugu horeeyay kamay badnayn intaad haysato maanta, haddii aanay intaad haysataa kaba badnaynba. Ninkani wuxuu aad u jeclaa oo kaliya inuu abuuro ganacsi guulaysta taasina waa sababta uu u raacay riyadiisii aanu u xaqiijiyay.
Hadaba waa maxay cudur-daarada aad maalin walba naftaada u sheegtaa? Lacag kugu filan mahaysatid? Waxbarasho fiican ma haysatid? Dadka kugu xeerani kuma

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhiirigaliyaan kumana garab istaagaan?
Jack Ma muu haysan qof dhiirigaliya oo cadaadiya balse damacaa xoogan ee ku gubayay si uu guul u gaadho ayaa ka dhigay ninka uu maanta yahay. Jack Ma waa ninka ugu taajirsan chinaha, waana mid ka mid ah dadka ugu saameynta badan internetka. Jack Ma waa nin loo qiri karo inuu adkaysi iyo hal adaygnimo leeyahay maadaama uu nolosha waxyaabo badan ku guuldareystay oo qof waliba isku dhiibi lahaa sida:-

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

1.Dugsigii hoose wuu dhacay
2.Kii dhexe wuu dhacay
3.10 jeer uu waayey Jaamacadda Harvard.
4.dhawr shaqo waa loo diidey sida askarnimo iyo shirkadda fast food ka ee KFC.
Inkastooy sidaa tahay haddana marna muu ka rajo go'in inuu naftiisa horumariyo.Intaa ka dib wuxuu noqday macalin, macalinimaddana wuxuu ku qaadan jirey lacag aad uyar ilaa uu noqday macalinkii iskuulka uu dhigo ugu wanaagsanaa.Markii uu isku arkey inuu macalinimadda ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

wanaagsan yahay ayuu go'aansadey inuu shirkad sameeyo wuxuuna dhisey shirkadda weyn ee Alibaba.Jack Ma shan sano lacag kamuu helin shirkaddiisa laakiin wuu usabray meelo badana lacag buu uga soo amaahdey si uu usii wado fikradiisa Isku soo wada duuboo Jack Ma imminka waa bilyooneer waana mulkiilaha ugu sareeya shirkadda Alibaba.

Jack Ma Ka baro sifooyinkan:-

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

1.Guuldaraddu waa jaran jaradda lagu gaadho hodantinimadda.
2.Waligaa ha niyad jabin oo ha quusan.
3.Hadaad fikrad cusub la timaado, usabir ilaa ay dadku kula fahmayaan.
4) Waa suurto gal: waxaa suurto gal ah inaad ka bilawdo ganacsigaaga meel aad u hooseeysa oo aad noqoto bilyaneer (maahaba milyaneeer) Jack Ma wuxuu tusaale fiican u yahay dadka ka soo bilaabay meel ka hooseysa zero iskuna

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

daray liiska ugu sareeya ee taajiriinta adduunka.
5) Horaa loo samayn karaa: sharci ma'aha balse horaad ugu guulaysan kartaa. Jack Ma wuxuu gaadhay guul isagoo ku jira da'diisa 30 meeyaha.
6) Marka ay riyadaada iyo hamigaagu weyn yahay, waxyaabaha hoose kuma dhibi doonaan: Jack Ma wuxuu ku noolaa nolol adag, muu ahayn
7)Iney bilaabidu mihiim tahay waayo hadii aanu bilaabi lahayn bilaabida website Alibaba.com manta muu jireen guushana may

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

jirteen hadaba hadii fursad hayso bilaw manta

15: SHEEKADII GUUSHA EE IBRAHIM ELFIQI

Sheekada **Ibrahim Alfiki** waa sheeko guul ah oo u qalanta in la sheego. I brahim Alfiki waa nin u huray noloshiisa intii ugu badnay inuu dadka kale baro sida looga gudbo caqabadaha ka hor yimaada intay ku jiraan socdaalka ay guusha ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

rabaan. Ibrahim alfiki wuxuu noloshiisa intii ugu badnayd ku bixiyay sidii uu u faafin lahaa fikir iyo akhlaaq togan. Wuxuu u arkay sheekada noloshiisa inay tahay tusaalaha ugu fiican ee qof gaadhay caanimo balaadhan iyo lacag isagoo kaliya aaminsanaa riyooyinkiisa ilaa ay dhab ka noqotay.

NOLOSHII HORE EE IBRAHIM ALFIKI IYO SIDA UU HEERKA KU GAADHAY

Ibraahim Alfiqi noloshiisii hore waxay ahayd mid ka duwan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

nolosha dadka kale. Wuxuu ku dhashay dalka Masar sanadku markuu ahaa 1950. Wuxuu degree jaamacada ee ugu horeeyay ku qaatay kuliyada dalxiiska iyo Huteelada. Kadib qalin jabintiisii waxay sanadku markuu ahaa 1978 isaga iyo xaaskiisii u socdaaleen dalka Canada si ay u helaan nolol fiican. Markii uu yimiday dadkii uu la kulmay ee Canada joogay waxay u sheegeen inuu dalkiisii iskaga noqdo maadaama aanay waqtigaa wadankaa ka jirtay camal la'aani. Ibrahim Alfiki lacagtii uu markaa haystay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxay ahayd $1000 oo kaliya dareenkaa xooganina muu niyad jabin balse Ibrahim wuxuu bilaabay inuu shaqo raadsado. Wuxuu galay waraysi shaqo mid kamid ah huteelada dalka waxaanu u sheegay maamulihii hoteelku "Kuma haboonid shaqada huteealada" Ibrahim wuxuu ka tagay halkii isagoo niyad jabsan balse wuxuu go'aansaday in aanu quusan. Laba maalmood gudahoodna wuxuu helay laba shaqo. Labada shaqo tii ugu fiicnaydna waxay ahayd inuu xalo ama dhaqo saabaanka ama weelka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

cuntada laga cuno mid ka mid ah hoteelada dalkaasi. Inkastoo shaqadaasi aanay ahayn ta ugu fiican hadana wuu aqbalay shaqadii isagoo ku adkaystay inuu socdaalkan kasoo bilaabo meel aad u hooseysa ilaa uu ka gaadhayo meel sare. Ibrahim wuxuu si dag-dag ah horumar uga sameeyay shaqadiisii marba marka ka dambaysana wuu sii dalacayay ilaa uu markii dambe noqdayba maamulihii huteelka, intaa kadibna wuxuu ku guulaystay abaalmarin ah maamulaha ugu fiican huteelada ee waqooyiga

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

America, intaa kadib hadana wuxuu noqday mid kamid ah dhiirigaliyaayasha ugu weyn ee dalka Canada, dhamaan Carabta iyo Wadamo kaloo badan. Ibrahim wuxuu ku casho casuumay ninkii huteelka lahaa ee markii ugu horeysay diiday intii ay ku jireen wada hadalkoodana wuxuu u sheegay inuu yahay wiilkii yaraa uu barigii diiday. MAXAYNU KA BARRAN KARNAA SHEEKADAN: - Dadka Guulaha Gaadhaa Wax Muhiimad ah ma siiyaan diidmada: Ibrahim Alfiqi wuxuu takhasus-kiisu ahaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Hoteelada aqoon badana wuu u lahaa, balse markii ugu horeysay waxaa loo sheegay inaanu ku haboonayn ka shaqaynta huteelada, balse wuxuu ahaa qof aaminsan naftiisa dhagna umuu dhigin diidmadii lagala horyimiday ilaa uu markii dambe u cadeeyay qofkii diidanaa qaladkiisa. Hadii aad rabto inaad nolosha guul ka gaadho waa inaad ilawdaa diidmooyinka sababtoo badankoodu wax micno ah ma sameeyaa. -Aamin Naftaada: Sideebuu qof uu sii wadan karaa socdaalkiisa isagoo la kulmaya

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

diidmooyin badan hadana aan rajo dhigayn? Dhamaan dadka guulaha gaadhay waxay si adag u aaminsanaayeen naftooda taasina waa sababta diidmooyinku aanay u gilgilin kalsoonida ay ka qabaan naftooda. La Noolow oo jacaylka Illaahay, ku dhaqan sunaha nabigeena (Csw), Yeelo iimaan, Kuna mahadnaq waxaad haysato.

Talooyinkan ayaa ah kuwo qof kasta

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

oo raaca anfacaya wax badanna noloshiisa ku soo kordhinaya. Inta badan aqoonta waxa laga dhaxlaa aqoonyahanka fikirka fayaw, jeeroo la dabogalana waa mar kasta oo lagu sii durko cilmiga nolosha bani-aadamka iftiimiya. Tallaabooyinkan waxa soo bandhigay Dr. Ibrahiim Alfiqi oo dunida dacalladeeda caan ka noqday muddadii uu noolaa, isaga oo soo saaray buugaag badan oo ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

hadlaya Cilmi Nafsiga iyo Horumarinta Nafta.

Samayso wakhti gaar ah oo 10 ilaa 30 daqiiqo oo socod ah, adiga oo dhoolla-cadaynaya. Fadhiiso keligaa adiga oo aamusan muddo 10 daqiiqo ah maalin kasta.
Hurdadaada ku koob 7 saacadood maalintii.

Inta aad nooshahay ku noolow saddex shay : (Awood +

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Rajayn wanaagsan + Dareen xammaasad leh).
Ciyaar mid ka mid ah ciyaaraha maaadda leh maalin kasta.
Waxaad akhridaa kutub ka badan intii sannadkii hore aad akhriday.
Sii wakhti gaar ah oo aad ku quudiso ruuxdaada: (Salaad, Tasbiix, Qur'aan akhris ...)
La qaado wakhti dadka da'doodu dhaaftay 70 gu' iyo kuwa kale ee ka hooseeya 6 jirka.
Waxa aad samaysaa riyo ka badan inta aad soo jeeddo.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Badi cuntooyinka dabiiciga ah, yaraysana kuwa la farsameeyay. Cab biyo badan oo jidhkaaga ku filan.
Isku day in aad ka qosliso saddex qof maalin kasta.
Ha ku lumin wakhtigaaga qaaliga ah hadal-badnaan.
Iska illow mawduucyada qaar, hana u sheegin lammaanahaaga khaladaad hore oo laga soo gudbay, waayo waxay xumayn kartaa ilbidhiqsiyada haddadaada.
Ha u ogolaan afkaarta taban in ay ku maamulaan, tamartaadana

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

gelin arrimaha togan ee faa’iidada leh

16: WIILKII YARAA EE GUULAYSTAY

Markii uu **Mark zuckerberg** uu soo gaadhay magaalada Palo Alto afar sanno ka hor muu haysan gaadhi gaadhsiiya gurigiisa amma shaqo uu qabto,

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

si uu u helo wax uu ku noolaado. Si aannu sawirkani inoogu noqon mid mala awaal ah, Mark zuckerberg manta waxa uu ka mid yahay dadka hoggaanka u ah bogga dadweynuhu ku kulmo ee Facebook.com oo ku caanbaxay in dadku ay ku wada xidhiidhaan. Waxaannu diiday gacan kasta oo u soo bandhigta inay ku maalgashato bilaayiin dollar. Ma rumaysan kartaa arrintaa? Saddexdii sanno ee ugu dambeeyey bogga Facebook oo aan haysan xataa guri kirro ah oo loogu soo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

hagaago, ayaa noqday mid ay soo dhaweeyaan oo ay ka helaan xafiisyada ugu waaweyn adduunka. Nolosha wiilkani waxay u eeg tahay sidii sheeko filim oo kale, tiknoolajiyada noocan ahna wuxuu bilaabay intii uu ku jiray waxbarashadiisa jaamacadeed. Qol (dorm) ka mid ah dhismaha jaamacaddii uu dhiganaayey ee Harvard ayuu ka bilaabay hawlgalkiisa, fakir uu doonaayey in uu bulshada oo dhan wada gaadho, taas oo soo jiidatay indhaha dad badan. Ardeyda jaamacaddu waxay bilaabeen inay si joogta ah ugu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

soo dhawaadaan qolkiisa, iyaga oo doonaayey in ay shakhsi ahaan ogaadaan waxa uu ku mashquulsan yahay, waxa kaga soo baxay ardeydii qolkii uu ku jiray Mark fikir ka dhigay Superman oo si kooban adduunka u gaadhay. Bilawgii fikradan waxa uu ka bilaabay bog ay ku wada xidhiidhaan ardeyda jaamacadda oo kaliya waxaana loo bixiyey Networking Site, haseyeeshee iminka dadka ku wada xidhiidha waxay ka badan yihiin kontan milyan oo qof (50,000,000) oo ay ku jiraan shaqaalaha laamahaha

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dawladaha iyo shirkadaha waaweyn. Maalin kasta waxa soo booqda boggan dad aad uga tirro badan dadka si joogtada ah u isticmaala. Mid ka mid ah shirkadaha qiimeeya dhaqdhaqaaqa internet-ka ayaa ku tilmaamay Facebook inuu yahay bogga 6aad ee ugu isticmaalid badan Maraykanka dhexdiisa, taas oo micnaheedu yahay in 1% waqtiga internet-ka

lagu bixiyo la dul fadhiyo Facebook. Sidoo kale shirkadaasi waxay tilmaantay inuu Facebook ku jiro kaalinta

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

koowaad, marka la eego dhinaca isku gudbinta sawirada, maalin kastana waxa la isku waydaarsadaa in ka badan lix milyan (6000,000) oo sawir. Facebook wuxuu tartan xawli ah kula jiro barta macluumadka laga raadiyo ee Google, Flickr iyo shirkadaha kale ee hormoodka u ah tiknoolajiyada ee ay daah-fureen dhallinyar da’doodu aad u yar tahay. Dadka fallanqeeya arrimaha dhaqaalahu waxay tilmaameen tallaabooyinka uu ku socdo bogga Facebook in sannad kasta macaashkiisu noqonaayo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

boqol milyan oo dollar ($100,000,000), taas oo soo jiidatay indhaha suuqyada. Daah-furaha shirkadda Facebook waxa ka horyimi tartan iyo loolan adag oo uu adduunka la galay, taas oo dadka dhaliilaa ku tilmaamaan inuu suuqa ku soo galay si aan sharci ahayn, waxase lagu tilmaamay inuu waligiiba ahaa qof kaligii socod ah. Mark wuxuu ku barbaaray xaafadda ay degaan dadka hantida badan ee Dobes-fibric oo ku taal magaalada NewYork, waqtigii uu yaraana wuxuu bilaabay inuu ku

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ciyaaro kombuyuutarada gurigooda yaala, taas oo u sahashay inuu si fiican u barto barnaamijyada uu ka kooban yahay kombuyuutarku, isaga iyo nin ay saaxiib ahaayeen, ayaa soo saaray barnaamij qayb ka ahaa MP3 oo ay u bixiyeen Winamp oo ay ugu talagaleen inuu sahlo dhegaysiga muusiga. Arrintani waxay soo jiidatay oo ay muhiimad weyn u noqotay shirkaddo waaweyn oo ay ka mid yihiin shirkadda Microsoft iyo American Online oo u soo bandhigay in barnaamijkaa ay ku darsadaan telefoonada

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

gacanta ee ay soo saaraan. Bogga Facebook.com, wuxuu hawada si rasmi ah u galay 4 February 2004-tii, kaas oo ay booqdeen kala badh ardeydii jaamacadda dhiganaysay, muddo laba toddobaad gudahoodna waxa booqday saddex meeloodow laba meelood. Muddo ka dibna waxa ku soo biiray saaxiibadii Dustin Moskobitz iyo Chris Hughes oo ka caawiyey inay ku kordhiyaan qalab si fiican ugu shaqeeya oo u fududaynaaya dadweynaha adeegsanaaya booqashada boggan.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Ardeydaydii dhiganaysay kulliyadaha kala duwan ee Jaamacadda Harvard waxay jeclaadeen inay ku soo bandhigaan boggan taariikho kookooban oo ay leeyihiin iyo sawiradooda. Arrintaas oo dhiirigelisay in ardeydii jaamacadaha kale ay ku soo biiraan, sida ardeydii Jaamacadda Stanford. Markii la gaadhay bishii May dadka adeegsaday boggan, waxay ka koobnaayeen soddon jaamacadood, faa'iidada kaliya

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ee ka soo gali jirtay mulkiilaha boggan, waxay ahayd marka lagu baahiyo ogaysiisyada iyo hawlgalada ay leeyihiin ardeyda kala duwan ee dhigata jaamacadahaas. Lacagta ka soo gali jirtay xayeysiisyadaas, waxa lagu qiyaasay kumanaan dollar. Markii uu arkey Mark Zuckerberg guusha uu gaadhay, hadaladii uu yidhi waxa ka mid ahaa; “Waxaan rajaynayaa inaan safar ku tago California, si aan fasaxayga halkaas ugu soo qaato oo aan u dabaal dego guusha layaabka ah.” Dabayaaqadii sannadkii labaad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ee jaamacada oo ah sannadka oo uu daboolka ka qaaday bogga Facebook.com, wuxuu go'aansaday inuu joojiyo sii wadida jaamacadda, isaga oo door biday inuu hawlgal weyn ku sameeyo ballaadhinta boggiisa, waxaannu tagay magaalada Paola Alto, isaga oo ay la socdaan labadiisii saaxiib ee Moskobitzio Hughes, wax Panay kiraysteen dhisme, iyaga iyo Sean Parker oo ah ninka aasaasay bogga lagu kaydiyo faylasha ee Sharing Service Napster, dhismahaasi wuxuu u dhawaa jaamacadda Stanford

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

oo dhallinyarta aadka u isticmaashay Facebook ay ku tilmaameen inay ahayd meeshii digaagadu ay dhigtay beedka dahabka ah. Bishii July sannadkii 2004-tii, shirkadda iyo bogga Connectu waxay dacwad ka dhan ah ku soo ogeen Mark Zuckerbergoo ay ku eedeeyeen inuu ka xaday dhammaan hawlwadeenadii khubarada ahayd ee shirkadooda, si uu ugu hormariyo boggiisa gaarka ah. Haseyeeshee, ilaa iminka dacwadaas si rasmi ah looma qaadin. Mark Zuckerberg, wuxuu eedayn taa la mid ah u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

soo jeediyey shirkadda Connectu oo uu ku tilmaamay inay ka xadeen xeerarkii gaarka ahaa ee boggiisu lahaa oo ay ku horumariyeen boggooda iyo arrimo gaar ah oo ay leeyihiin Sidaa darteed, dacwadaasi waa mid ilaa waqtigan ka

17: CALAAMADO AAD KU OGAAN KARTO INAAD WADADA GUUSHA KU TAAGAN TAHAY

Waxaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

run ah in qof kasta oo dunidan ku nooli uu jecel yahay in uu guul ka
gaadho noloshiisa, habeen iyo dharaarna uu ku riyoodo sida ugu fiican ee
uu guushaas u soo hoyn karo. In kasta oo sida guusha loo yaqaanno ama
nooca guusha ay dadku ku kala aragti iyo faham duwan yihiin.

Si
kasta oo uu qofku ugu dadaalo in uu guul, haddana dhibtu waxa ay tahay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

in aanu marnaba ogeyn in jidka uu hayaa uu yahay kii uu ku gaadhi lahaa
guusha uu hiigsanayo, waxa aanu jeclaan lahaa in uu ugu yaraan helo
bidhaan yar oo uu ku garan karo in ugu yaraan jidka uu hayaa uu yahay
kii uu guusha ku gaadhayey. Qormadan waxa ay taabanaysaa arrimo qofka
lagu arko loo malayn karo in uu jidkii guusha hayo, arrimahan oo ay

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

xeeldheerayaal muddo baadhis iyo sahamin waday ka soo dheegteen
dabeecadaha iyo hab-dhaqannada dadka dunida ee lagu majeerto guusha iyo horumar ay naftooda gaadhsiiyeen:

1. Mushaharkaagu yaanu noloshaada maamulin:

Haddii
 aad weli xorriyad buuxda u leedahay in shaqadaada marka aad doonto ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

tegi karto, adiga oo aan qiimayn gaar ah siinayn qaddarka mushahar ee
aad qaadato, xitaa haddii shaqada kale ee aad ku wareegayso aad ka qaadanayso mushahar bulshada kugu xeerani u aragto in uu aad u yar
yahay, waxa aad xaqiijisay guul ay dad badan oo maanta dunida kugula
nooli xaqiijin kari la’ yihiin. Waxa aad haysataa xorriyad aad ku qaadan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

karto go’aanka aad doonto oo aanad masiirkaaga oo dhan ku xidhayn
go’aamada mamaulaha ama xaqlaha shaqada aad ka shaqayso. Adduunyadu ma’aha in aadn mushahar badan hesho, balse waa in aad xorriyad badan
hesho si aad waqti ugu hesho arrimaha noloshaada farxad geliya iyo
dadaallada aad guul shakhsi ah ku raadinayso.

2. Xidhiidhka aad bulshada la leedahay:

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Waa
 sidee xidhiidhka aad la
leedahay dadka kugu dhow,
sida xaaskaaga ama
saaxiibbadaada kugu dhow. Ma
xidhiidh mushkilad iyo
caqabado badan,
canaan iyo cabasho ka buuxdo
oo mar kasta khilaaf uun la
xallinayaa?!

Mushkiladaha
 iyo is-fahmi waa soo gala
xidhiidhka bulsho ee qofku waa
caqabad ka hor

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

istaagi karta in uu gaadho
guusha uu niyadda ku hayo.
Dadka kugu xeeran
oo aad xidhiidh bulsho oo
qodax yar la yeelataa waxa ay
astaan u tahay
in aad haysato waqti aad u
jeedsan karto dadaalladaada
khuseeya guusha
nolosha aad ka rabto.

3. Qorshe ma ka leedahay bisha
soo socota:

Kama

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

hadlayno qorshayaasha faahfaahsan ee sannadka soo socda aad leedahay,
laakiin waxaa muhiim ah in ugu yaraan muddo yare e kugu soo foodleh aad
ka leedahay qorshe cad. Waa in aad aragti ka leedahay arrimaha waaweyn
ee noloshaada shakhsiga iyo mihnaddaada shaqo khuseeya ee ay tahay in
mustaqbalka dhow aad qabato, sidoo kale waa in aad leedahay halbeeg aad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

taqaanno oo bil kasta
aakhirkeeda aad ku qiimayn
karto waxa kaaga
qabsoomay qorshayaashaadii
bishii hore, isla markaana aad
dejiso
qorshaha bisha xigta aad
leedahay. Haddii aanad hab-
nololeedkan marin
waxa ay u dhowdahay in aanad
guul la gaadhin ujeedooyinka
aad nolosha ka
leedahay.

4. Caawinta dadka:

Tusaale

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ahaan haddii aad isla imika xasuustaada dib u celiso ma xasuusan kartaa
ficillo iyo hawlo aad ku caawinayo dad u baahan oo aad samaysay bishii
ina dhaaftay?

Caadi
ahaan dadka badankoodu ujeedada ugu mudan ee ay adduunka ka leeyihiin
waa in dharaaraha ay joogaan ay farxad ku noolaadaan,
waxase ay ma’oggan

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

yihiin in furayaasha farxaddaasi ay yaallaan meel aad uga dhow meesha
fog ee inta badan laga raadiyo. Keliya waxaa ku filan in ay dadka
caawiyaan, xitaa haddii ay noqonayso in ficil yar oo fudud ay ku
caawinayaan, tusaale ahaan arday aad ka caawisay dhamaysashada
waxbarashadiisa oo ka kala go'i lahayd caawimadaada
la'aanteed, ama in

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

qof aad ka caawiso hawlo xafiis ka galay. Mar kasta niyadda ku hay in
aad cid caawiso, waxa aad arki nolosha oo farxad kuu yeelatay.

5. Ku dadaal in
aad caafimaadkaaga ilaaliso:

Cuntada
 dufanku ku badan yahay, jimicsi la’aanta iyo sigaar cabbistu
waxa ay ka
 mid yihiin arrimaha khatarta ku ah guusha mustaqbalka ee
qofka, waayo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

waxa ay ku keeni karaan
xaalado caafimaad darro oo ka horjoogsanaya
arrimo badan oo muhiim u ah noloshiisa iyo hawlo badan oo guusha uu rabo
 lama huraan u noqon lahaa.

Waxaa
 hubaal ah in wax kasta beddelkiisa iyo cawil-naqiisa la helo, xitaa
lacagta, laakiin waa ay adag tahay in caafimaadka beddel loo helo, sidaa

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

awgeed ku dadaal in aad jimicsi samayso xitaa haddii ay noqonayso
Saacad badkeed maalin kasta, hana joojin xitaa marka aad mashquulka
badan tirsanayso.

6. Wax cusub baro:

Marka
laga tago aqoonta laga dheefo shaqada iyo waxbarashada caadiga ah ee
jaamacadda, waxa aad naftaada bartaa in ay jiraan duruus kale oo cusub

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

oo ay barato. Ku dadaal in aad barato jimicsi cusub, xirfad cusub, ama
aad koorsooyin shaqadaada muhiim u ah ka barato jaamacadaha, maxaddada
iyo xitaa internet ka dhexdiisa.

Haddii
 aanad wax cusub baran, waxa aad ogaataa in aad ku dhex jirto dhibaato
nololeed oo ay tahay in aad xal u raadiso. Haddii aad aragto ruux mar

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

kasta waxbarasho wada, xitaa waxa uu baranayaa ha noqdo wax sahal ah oo
yare e, waxa aad ogaataa in uu jidkii guusha hayo. Maalin kasta oo
qorraxdu caafimaad kuugu soo baxdo ku dadaal in aanu gabbalku kuu dhicin
 adiga oo aan wax cusub korodhsan, ama xirfaddaada cusboonaysiin; waa
taas astaanta lagu yaqaanno dadka guulaysanayaa.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

7. Dhab ma kaa tahay in aad mushkiladda kaa hortimaaddo ka gudubtaa:

Waxaa
 jira dad si dhaqso ah isugu dhiiba mushkiladaha ka hor yimaadda oo aan
wax dadaal ah gelin ka gudbisteeda, iyaga oo aad mooddo in ay sugayaan
in xalku gacan kale ka yimaaddo ama mushkiladdu iyadu is xalliso. Waxaa
isna jira qof kale oo aan is dhiibin, ee si joogto ah isugu daya in uu

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ka gudbo mushkiladda soo waajahda, xitaa haddii ay tahay mushkilad ay
maskaxdiisu u arkayso in ay aad u weyn tahay; waana qofkaas qofka jidka
guusha hayaa. Si dhab ah oo aad isugu daydo in aad ka gudubto caqabadaha
 nolosha ee kaa hor yimaaddaa waa astaan caddayaysa in aad leedahay
xirfadda uu u baahan yahay qof kasta oo hiigsi fog leh, noloshana guul
ka gaadhayaa.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

8. Waqtigaaga waa aad xakamayn kartaa:

Is
 weydii inta saacadood ee aad ku qaadato baadhista iyo ku sheekaynta
barkulannada bulsho ee internet ka, inta jeer ee aad asxaabtaada iskala
xidhiidho adiga oo aan ujeeddo sugan lahayn?

Haddii
 aad aragto qof aanay u xisaabsanayn saacadaha maalin kasta ka lumo

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

isaga oo aan wax faa’ido leh qabsan, waxa aad garataa in uu hayo jidka
kuwa guul darraysta. Dadka ujeedadoodu tahay in ay xaqiijiyaan
riyadooda, inta badanna guul ka gaadha noloshu waa kuwa awooda in ay
xisaabiyaan oo xakameeyaan waqtigooda.

9. Dakhliga ku soo gala oo aad badh kaydsato:

Dakhliga

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

ku soo galaa xaddi kasta oo uu yahay, awood ma’ u leedahay in aad wax
uun ka kaydsato, haba yaraado ee. In qofku dakhligiisa wax ka dhigtaa
waa xirfad karti iyo go’aan adayg u baahan, oo aanay sahal ahayn in qof
kastaa sameeyo.

In
qofku awood u leeyahay in uu maamulo dakhliga soo gelaya, oo uu badh ka

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

dhigto haba yaraato ee waa calaamad si cad inoo muujinaysa in uu yahay ruux leh hal-adayg iyo xisaabtan, waana calaamad lagu garto dadka jidka guusha haya.

10. Maxaa kugu qasbaya shaqada aad hayso ama hawsha aad hadda hayso?

Weli naftaada ma weydiisay, waxa kugu qasbaya in inta aad subaxda kacdo aad

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

qabato hawsha ama shaqada aad hayso? Maxaa aad u shaqaysaa? Ma is tidhi, adiga oo naftaada waraysanaya. Haddii su’aashaa aanad jawaab cad u haynin. Ama aad ku jawaabtay uun in ujeedada aad u shaqaysaa ay tahay in aad lacag hesho ama mushaharku uu yahay sababta aad dartii u shaqayso.
Waxaa ku fiican in aad shaqada ka tagto oo aad raadiso hawl iyo shaqo
kale oo aad jeceshahay qabashadeeda.

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

Waa
 run oo lacagtu nolosha waa u lama huraan, laakiin isla markaasna waxa
aad u baahan tahay, in aad lacagta ka hesho shaqo aad xiise iyo jacayl u
 hayso, haddii kale oo aad waqtigaaga ku lumiso shaqo aanad jeclayn ee
aad lacag uun ku gashay, waxa aad ogaataa in aanad guusha jidkeedii
haynin oo uu kaaga dhow yahay ruuxa maal yar ka hela shaqo uu aad u

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

jecel yahay.

Dhamaad

Dhamaanteenba Alle subxaana wa tacalaa ha inaga dhigo kuwii guulaysta if iyo aakhiraba Allaa weyn ninkii aminaa Awoodleh

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)

marwalwa ilaahay talo saaro

Copyright Buug online 2018 aydarus ahmed (Qalinle)